جماعة الصادعون بالحق

FASALKA 6AAD

# Shuruux

## معالم في الطريق

## Shareeca Kowni-Ah

Sh. Mustafa Kaamil Muxammad

Kitaabkan waxaa iska leh Jamaacada Al-Saadicuun Bil-Xaq

Xuquuqda daabicidda iyo fidinta waxay u dhowrantahay jamaacada

Waa la faafin karaa qoraalka, iyada oo xigasho la samaynayo,
waxbana aan laga baddalaynin

# Tusmada Cutubka

Hordhac ........................................................................................................................1
Islaamku waa rumayn iyo ku Dhaqan ...............................................................................2
Kownkaan Allaah baa leh ..................................................................................................4
Aadanuhu waa qayb ka mid ah Kownka ..........................................................................7
Shareecadu waa qayb ka mid ah Nidaamka Allaah.........................................................8
Isla jaanqaadka Nolosha Aadanaha iyo Kownka ............................................................10
Miraha ka dhasha Isla jaanqaadkaas ................................................................................12
Ciribxumada ka weecasha Fidrada....................................................................................18
Waa maxay hadafka ku dhaqanka Shareecada Allaah ...................................................19
Allaaha kownka leh ayuun baa mudan maamulka Nolosha...........................................21

# Shareeca Kowni ah

شريعة كونية

## Hordhac

Halkan waxaan kusoo bandhigaynaa cutub cusub oo ah shareeco kowniah.Sidaan ugabarannay Ustaad Sayid Qudub inuu cutub kasta oo cusub nugusoo kordhiyo macno hor leh iyo muqaal cusub, ha ahaato dhinaca aragtida ama manhajka Islaamka ama dhinac ka mid ah dhinacyada akhlaaqda, dhaqanka iyo ilbaxnimada ama dhinacyada kale ee badan ee diintaan Islaamku leedahay.

Fikradahaa cusub ee uu Ustaad Sayid Qudub soo kordhinayo waa kuwo kasoo burqaday diinta Islamka gunteedii (asalnimadeedii) iyo garasho xeeldheer oo uu xaqa u lahaa. Taasoo uu dareemayo qof kasta oo ku dhex noolaada Qur'aanka jawigiisa iyo harkiisa. Fikradahaan cusubna wuxuu Ustaad Sayid kasoo qaatay diinta Islamka dabeecaddeeda ee uu Allaah ka dhigay diintii bani'aadamka oo idil ama sida dhabta ah diinta adduunyada idilkeed.

Islaamku waa diinta adduunka. Wax kasta oo adduunka jooga wuxuu isudhiibay Allaah ee ma aha bani'aadamka oo keliya kuwo Allaah isudhiibay maxaa yeelay Islamka macnihiisu waa inlaysu dulleeyo oo loo hoggaansamo Rabbiga ka taliya caalamka oo dhan.

Waxaa laga yaabaa dhinacaa marka laga eego in cutubkaan marka laga hadlaayo laga fahmo in shareecada diintani tahay shareecada adduunka, taasina ka dhigayso tusmo ka mid ah tusmooyinka dhabbaha.Ma jiro mad'hab ama aragti kale oo la tartami kara.

Sida dhabta ah mar kasta oo aan la noolaanno Qur'aanka, tusmooyinka diinta islaamka iyo kitaabkaan (TUSMOOYINKA DHABAHA) kaasoo uu isku deyay qoraagu inuu ku faafiyo wax kasta oo uu dareemay, la noolaaday ama uu ka ogaaday tusmooyinka iyo xaqiiqooyinka diinta Islaamka ayaa wuxuu qofka bani'aadamku ka buuxsamayaa inay diintani tahay xaqa keliya oo ka jira adduunkan iyo in qofka Allaah ku hanuuniyo garashada diintani uu yahay mid Allaah siiyay nimco iyo khayr dhammaantii, isla markaana qofkii ka habaaba (waddada) diintan inuu yahay mid ku dhex lumay mugdiyada siduu Allaah ku tilmaamay.

Mar kasta oo aan ka hadalno ama la noolaanno Islaamka waxaa no kordhaayo dhawaanshaha Allaah annu ku raaxaysanno kuna liibaanayno sida Allaah noogu galladaystay xaqaan. Sidoo kale mar kasta oo nafteennu ku dhex milanto miidda macaanee diintaan oo uu noqdo sidii dhiigga mid dhex socda xididdadeena (ama waa sida la rabo inay noqoto) ayay waxay noqonaysaa mid aan suurta-gal ahayn nolosha la nool yahay haddii aan diinta la haysanin, taasina waa macno ka mid ah macaanida sida sare Allaah loogu dhawaanaayo.

Waxaan leeyahay "Mar kasta oo uu bani'aadamku la noolaado Qur'aanka, mar kasta oo uu la noolaado Allaah iyo mar kasta oo uu Allaah ugu dhawaado adeecista, cibaadeysiga iyo in lagu Jihaado waddadii lagu kor-yeelayay kalimadda Allaah, mar kasta oo uu ku dhex milmo, kor ugu kaco iyo mar kasta oo uu iftiinku dheeho jiritaankiisa, halkaas oo ay noqonayso noloshiisu mid aan ka go'i karin oo uusan awoodin inuu noolaado iftiinkaa la'aantii. Haddii uu qalbiga aadanahu heerkaas gaaro wuxuu la qabsanayaa diintaan, waana markaas marka aan filan

karnaa in aanu qalbigu weligii dambe diinta Islamka dib uga noqonin, kaddib markuu dhedhemiyay diintaan macaankeedii. Maxaa yeelay qofka diinta macaankeeda dhadhansadaa waxaa dhib ah inuu dib uga noqdo. Hayeeshee waa inuu dhadhansigaasi yahay mid run ah, xeel dheer oo kuna dheehan run iyo dar-Allaah.

## Islaamku waa rumayn iyo ku Dhaqan

Wuxuu leeyahay Ustad Sayid **"Marka uu islaamku dhismihiisa ictiqaadka ku abuurayo qalbiga qofka iyo waaqaciisa iyadoo ay asaas u tahay in Allaah kaligii addoomnnimo la siiyo, kana dhigaayo addoonnimadaas mid ka muuqata ictiqaadka, cibaadada, iyo shareecada, maxaa yeelay addoonimadaas dhammaystiran waxay u taagan tahay macnaha "Laa ilaha Illallaah", ka qaadashada habka loo fulinaayo addoonnimadaasna laga qaato Rasuulka SCW kaligii, waa macnaha qiridda in Muxammad (SCW) yahay Rasuulkii Allaah…."**

Markuu Islaamku saa yeelayo... waana qaddiyadda diintaan; waaba qaddiyadda kownkaan; ictiqaad inuusan noqon in Allaah qalbiga laga rumeeyo oo kaliya, amaba dareen qalbi iyo nafsi oo kaliya, hayeeshee waa inuu ahaadaa dhismahaas ictiqaadka ah mid ku weyn oo gun dheer ku leh damiirka iyo waaqaca…Allaah ma aqbalo in la kala saaro ictiqaadka qalbiga iyo dhaqanka waaqaca ka muuqdo. Sida foosha xun ee ay sameeyaan kuwa sheeganaya diinta Islamka ama diimaha kale ee xagga Allaah ka yimid sida Yuhuudda, Nasaaradaiyo kuwa Islaamka sheegta. Kuwaas dhammaantood waxay ku sheeganayaan carrabkooda ama qalbigooda diin aanay ku oogeyn noloshooda. Inkastoo Yuhuuda iyo Nasaarada ay weli ku dambeyso waxyaabo kasoo haray diintii dhabta ahayd ee Allaah iyo iyadoo ay kutubtooda iyo caqiiddooyinkooda ku firirsantahay sharciyo sax ah hayeeshee caqiiddada kuma dhex oogaan qalbiga iyo waaqica toona.

Kuwa Islaamka sheeganaya xaalkooda ayaa kasii daran oo kasii baadiyaysan kuwa kale (Yuhuudda &Nasaaro) maxaa yeelay Allaah wuxuu ka ilaaliyay ummaddan kitaabkooda (Qur'aanka) in la beddelo. Haddaba haddii ay Yuhuudda &Nasaarofaracoodii ay is arkeen iyagoo ka dhimbil qaadanaayo kutubo dhab ahaanti ahaa kuwa la dooriyay oo sidaa darteed ay laqaloocdeen iyagoo isu haysta inay toosan yihiin, haddaba kuwa iyagu sheeganaya Islaamka maxay jidka uga qaloocanayaan?

Kuwa Islaamka sheeganaya ma haystaan wax cudurdaar ku siinaya inay habaabaan maxaa yeelay kitaabka hortooda ah iyo ileyskii Allaah noloshooda ka dhex taagay waa mid weligii iftiimaya oo birqaaya fududna.

﴿ وَلَقَدْ يَسَّرْنَا الْقُرْآنَ لِلذِّكْرِ فَهَلْ مِنْ مُدَّكِرٍ ﴾ [القمر: ١٧]

"Waan fududynay Qur'aanka xusuus darteed, ma jirtaa cid waansamaysa?"(Al-Qamar: 17).

﴿ إِنَّا نَحْنُ نَزَّلْنَا الذِّكْرَ وَإِنَّا لَهُ لَحَافِظُونَ ﴾ [الحجر: ٩]

"Annagaa soo dejinay Qur'aanka annagaana dhawreyna" (Al-Xijri: 9).

Haddii ay dadka diimaha kale haystaa wax cudurdaar ah ama uu Shaydaanku u qurxiyay waxay samaynayaan, marna ma haysan karaan cudurdaar muslimiinta ama kuwa Qur'aanka lakulmaaya.Waxaana dhab ahaanti ku oogantay kuwaas xujo dhammeystiran, sidoo kale dhab ahaantii waa xujo ku oogan aadanaha oo idil maxaa yeelay kitaabkan (Qur'aanka) loomasoo dejin qoom ama jinsi gaar ah waxaase loosoo dejiyay aadanaha oo idil si uu bani'aadamku

dhammaantii uu uga biyo-cabo ishaas saafiga ah ee Allaah si walba u ilaaliyay taasi oo mar waliba la cusboonaanaysa marxalad walba uu aadanaha ku tiigsado.

Sida darteed marna llooma helaayo cudurdaar ah inla kala saarorumeynta qalbiga ah iyo waaqica qofka, sidoo kalena looma helaayo cudurdaar ah inla kala saaro sheegashada iyo hab-dhaqanka qofka.

Haddii kala saaridaasi tahay mid ku foolxun dadka caamada ah waxay uga si foolxun tahay dadka sheeganaya iney yihiin horseedayaal nuurka u sida aadanaha iyo inay yihiin kuwa keligood fahamsan diintan gunteeda oona lakeli noqday fahamka xaqaan oo intaa kaddibna uu kala saaritaan ku yimid waxay rumeysan yihiin iyo waxay ku hadlaayaan ama ku dhaqmaayaan.

Arrinkaani wa khatar badan yahay, dadka sidaa yeelana way kasii nasiib daran yihiin, maxaa yeelay ma sinna dadka wax og iyo kuwaan wax ogayn, kuma sinna nolosha, hadalka, ficilka iyo abaalmarinta.

Sidaa darteed horseedayaasha waxaa laga rabaa wax aan dadka intooda kale laga rabin.Sidaan ka aragnay saxaabada Rasuulka (SCW); siday u garanayeen darajadooda iyo mas'uuliyadda saaran khatarta ay leeydahay iyo macnaha ay leedahay inay ahaadaan saxaabada Rasuulka (SCW) oo uu waxyiga kuso dagayay.Waxayogaadeen in arrintaasi saartay culays aan saarneyndadka intiisa kale. Sidaa darteed Islaamka waxay u qaateen si xoog leh uguna noolaadeen, kaddibna ayna dhaxalsiiyeen xaqaan muuqda iyagoo noogu so gudbiyay dhaqankoodii iyo camalkoodii inta aanay ku muujin hadal iyo sheegad.

Sidaa darteed qof kasta oo doonaya inuu asxaabtii Rasuulka (SCW) waddadoodii raaco waa inuu gartaa khatarta xilkaas ama muhimadaas leedahay iyo khatarta ay leedahay af ka sheegashada ama u abtirsiga jiil kii saxaabada, iyo khatarta inuu qofku lahaado hididiilo ah inuu ka mid yahay dadkii ay xagga Allaah uga hormartay inay Janada geli doonaan.

Arrimahaasi oo idil waxay horseedayaasha saarayaan culays weyn oo aan loo baahnayn inay marnaba seegaan ama ay moogaadaan iyo inaanay marnaba u bannaanayn inay ka gaabiyaan arrinkaas iyagoo ku cudurdaaranaya waxyaabaha dadka intooda kale ku cudurdaartaan iyo inaan laga aqbalidoonin waxyaabaha dadka intooda kale laga aqbalo.

Islaamkan ku oogayaa dhismihiisa ictiqaadka qalbiga qofka iyo waaqaciisa, si Allaah kaligii addoonnimo loo siiyo, Islaamkan ay la yimaadeen anbiyadii oo idil… Waa Islaamka ay maanta horseedayaasha sheeganayaan ee ay habboon tahay in qalbigooda iyo waaqacooda yihiin kuwa muujinaayo siday Islaamka ugu taagan yihiin xagga dareenka, ruuxda iyo hirgelintaba.

Waana taa sababta uu Ustad Sayid ugu bilaabay hadalkiisa cutubkan oraahdaan xeeldheerida leh **"Marka uu islaamku dhismihiisa ictiqaadka ku abuurayo qalbiga qofka iyo waaqaciisa iyadoo ay asaas u tahay in Allaah kaligii addoomnnimo la siiyo, kana dhigaayo addoonnimadaas mid ka muuqata ictiqaadka, cibaadada, iyo shareecada, maxaa yeelay addoonimadaas dhammaystiran waxay u taagan tahay macnaha "Laa ilaaha illalaah", ka qaadashada habka loo fulinaayo addoonnimadaasna laga qaato Rasuulka SCW kaligii, waa macnaha qiridda in Muxammad (SCW) yahay Rasuulkii Allaah…."**

Dhismaha ictiqaadka waa mid dhab ahaanti ku xiran "Laa ilaaha illalaah" iyo in Muxammad (SCW) yahay Rasuulkii Allaah.

Dhismahaas ictiqaadka qalbiga iyo dhaqanka waa lama huraan inuu yahay mid cuskan fulinta shahaadadda "Laa ilaaha illalaah" iyo in Muxammad (SCW) yahay Rasuulkii Allaah.

Ustad Sayid wuxuu leeyahay **"Islaamka markuu dhammaantiis ku oogayo dhismihiisa saldhiggaas ama asaas kaas oo kale, markaase ay shahaadada "Laa ilaaha illalaah" iyo in "Muxammad (SCW) yahay Rasuulkii Allaah'' ay mataleysaa manhajka nololosha ee Islaamka isla markaana ay sawirayso tilmaamaha manhajkaas iyo waxyaabaha uu la gaarka yahay**.

Taas macnaheedu waa in shahaaddada "Laa ilaaha illalaah"iyo in "Muxammad (SCW) yahay Rasuulkii Allaah'' ay tahay midda qeexaysa ama xaddidaysa Islaamka dabiicadiisa, aragtida ama fekerka Islaamka, manhajka Islaamka iyo waxyaabaha ay diintani gaarka u leedahay. Islaamka oo idil waa mid kasoo burqanaya in si cad loo fahmo dhabta "Laa ilaaha illalaah".

Ayadoo aan taas ka duulayno Dhismaha insaaninimada oo idil waxaa saldhig u ah fahamka"Laa ilaaha illalaah" oo si cad ama sax loo fahmo.

Ustad Sayid wuxuu leeyahay **"Markuu Islaamku dhismihiisa ku oogayo habkaas goonida ah, kagana duwan yahay dhammaan nadaamyada kale ee aadanahu garanayo, wuxuu u laabanayaa asal idil-kooban markuu ka war bixinaayo jiritaanka kownkan oo idil iyo manhajka kownkan oo idil ee ma ahan mid ka war bixiyo jiritaanka bani'aadamka iyo manhajka nolashiisa oo kaliya''.**

Dhabtii shahaaddadda "Laa ilaaha illalaah" ma ahan kaliya mid bani'aadamka noloshiisa saldhig u ah iyo bulshooyinka aadanaha oo kaliya balse waa mid saldhig u ah dhismaha kownka oo idil. Sidaa darteed markuu Islaamku nolosha bani'aadamka u celinayo xaqiiqada "Laa ilaaha illalaah" markaasuu insaanka la jaan qaadaya jiritaanka (kownka) oo idil si ay isu la maraan kownka hal dhabbo oo mid ah, kana soo fulayaan saldhig mideysan, waxaana hareenaya hal manhaj oo mid ah ayagoo wada caabudaayo hal Rabbi (Allaah) oo kaliya.

Taasina waa macne ka mid ah macaanida in nolosha bani'aadamku tahay mid kownka intiisa kale ku xiran mana ah mid ka go'an jiritaanka intiisa kale. Si kasta oo loo dhaho "bani'aadamku waa madaxa ugu sarreeya ama sayidka waxyaabaha la abuuray hayeeshe waa mid ka mid ah makhluuqaadkaas. Isaga iyo jiritaanka oo idil waxay ku ahaadeen hal doonis oo kaliya taasoo ah doonistii ama rabitaanki Allaah.

## Kownkaan Allaah baa leh

Ustad Sayid wuxuu leeyahay **"Caqiiddada islaamka waxay ku dhisan tahay in Allaah uu abuuray kownkan, Iraadada Allaah oo ah "ahow" buuna ku ahaaday.Wuxuuna Allaah kownkan galiyey qawaaniin uu ku socdo, taas oo waafaqsan nidaamka kownka oo idil iyo qaybihiisa**

﴿ إِنَّمَا قَوْلُنَا لِشَيْءٍ إِذَا أَرَدْنَاهُ أَنْ نَقُولَ لَهُ كُنْ فَيَكُونُ ﴾ [النحل: ٤٠]

"Oraahdayada aan shay ku dhahno haddii aan doonno shaygaas waa inaan dhahno ahow wuuna ahaan" (Al-Nahli: 40).

﴿ وَخَلَقَ كُلَّ شَيْءٍ فَقَدَّرَهُ تَقْدِيرًا ﴾ [الفرقان: ٢]

"Wuxuu abuuraywax kaste oo u qaddaray si qiyaasan" (Al-Furqaan: 2).

Xaqiiqadaas weyn ee cad, in Allaah uu abuuray kownkan iyo in caqiiddada Islaamku tahay mid ku dhisan xaqiiqadaas marag madoontada ah. Kownkaan oo idil wuxuu ka mid yahay abuurista Allaah, iraadada Allaah oo ah “ahow” buuna ku ahaaday. Haddaba waxaa jira Rabbi – Allaah – doonay inuu wax abuuro kaddibna ay sidaa ku abuurmeen.Wuxuuna Allaah kownkan wuxuu u dejiyey dhammaan qawaaniinta uu ku socdo taas oo ah nidaamyo isku sargoynaya dhaqdhaqaaqyada makhluuqaadku xagga Allaah ula jeestaan.

Garashada awoodda hanasho ee Allaah kownkan ku hantay ka sokow inay tahay xaqiiqo caqlgu garto waa dareen buuxdhaafaya nafta insaanka; markuu hurdo ama soo jeedo, markuu socdo ama fadhiyo…wuxuu dareemayaa mar waliba inuu hoos socdo kuna nool yahay harkii ilaahnimada iyo awoodda Allah iyo in Allah la jiro xilli walba, iyo in Allaah uu abuuray isaga iyo kownka oo idil, sidaa darteed marna ma ahaanayo mid ku nool wareer iyo kalinimo balse waa mid mar waliba ku hoos nool harka Ilaahnimada sharafta leh. Haddaba markii bani’aadamku yahay mid dareensan xaqiiqadaas ayada uun dhaqaajinays, haraynayso,hogaaminayso kuna nool yahay jawigeeda mar walba, shaki ku jiro inuu noqonayo addoon Allaah oo dhab ah.

Hadduuse iloobo - haba yaraatee- inuu yahay mid sidaa loo abuuray oo sidaa u nool,u soconayo, aduunkana ku yimid, oo aduunyaduna tahay mid sidaa loo abuuray, oo aysanisugu xirnaynmar walba doonista Allaahee awoodda badan iyo abuurista kownkaan, iyo in Allaah uu gacantiisa ku hayo wax walba oo kownkaan yaal, oo haddii Allaah faraha ka qaadane ay meel fog kuhoobanayso.Insaanku goortaas uu saa wax u illaawo wuu baadiyoobi doona, kana fogaan doonaxaqiiqada addoonnimada.

Markuu bani’aadamkuu ku nool yahay dareenkaas ah inuu mar waliba ku hoos nool yahay harka Ilaahnimada sharafta leh, markuu sidaas u nool yahay, waxaa hubaal ah inuu yahay addoon dhab ah oo badbaaday maxaa yeelay qofka sidaas u nool wuxuu lahaanayaa xaalad goonni u ah noloshiisa oo idil.

Ustad Sayid wuxuu leeyahay **“Jiritaanka adduunkan waxaa ka dambeysa doonista Allaah oo maamulaysa, qaddar dhaqaajinaya iyo xeer isku dubbaridaya. Xeerkaasi wuxuu isku duwayaa dhammaan qeybahakownkaan ka samaysan yahay, wuxuuna isku habeynayaa dhaqdhaqaaqoodaoo idil si aanay u burburin una kala daadanin ama isaga hor-imaan ama aanay u joojin dhaqdhaqaaqa nadaamsan ee joogtada ah ilaa intii uu Allaah doono,sida kownkaan u yahay mid u dullaysan una hoggaansan doonista Allaah ee maamusha, qaddarka dhaqaajinaya iyo xeerkii isku dubbaridaya, kownka oo sidaas ah il-biriqsine kama bixi karo, mana diidi karo doonista Allaah, mana khilaafi karo xeerka u dagsan, sidaas ayuu u wanaagsanaanayaa cillad ama fasaadna ku dhici maayo weligii illaa in uu Allaah doono mooyee”.**

Ereyadaan waa inaan akhrinaa marar badan si aan u fahamno macnahaan fudud eena xeeshadheer, kaasoo ku xiraya wax kasta oo kownka ku sugan bani’aadamkuna kamid yahay doonista Allah, iyo maamulkiisa iyo qaddarkiisa iyo sidoo kale inuu bani’aadamku ogaado inuu marna ka baxsanayn wuxuu Allah la doonay. Qayb weyn oo ka mid ah nolosha bani’aadamka waxay u hoggaansantahay xeerarkuu Allaah u dejiyay.Tusaale ahaan qalbiga bani’aadamku tan iyo maalintii uu dhashay ilaa uu ka dhinto wuu garaacmayaa. Sidoo kale dhammaan xubnaha jirka bani’aadamka way shaqeeyaan iyadoo qofku waxba shaqo ah ku lahayn, waxayna u shaqeynaysa qaab sugan uu Allah u doonay inay u shaqeyso.

Jiritaankaan oo idil waa mid si dhameystiran u laylisan kuna socda doonistii Rabbi; qaddar iyo maamul iyo xeer gaar u ah ku socda. Jirka bani'aadamka iyo xubnihiisaba marna kama leexdaan sidii Allaah ugu talo galay. Haddaanu u malyno il-biriqsiba ha ahaatee in xubnaha jirka bani'aadamka ku yaalaa loo daayay doonista insaanka marna ma noolaadeen bani'aadamku daqiiqadba ha ahaatee. Haddaan malysano inaan annagu nahay kuwa qalbiga ka shaqaysiinaya oo ka dhigaya inuu garaaciisa badiyo ama yareeyo, ama sidoo kale aan annagu u talino kellida, ama aan nahay kuwa nidaamiya beerka shaqooyinkiisa ama xubnaha kale ee jirka midday doonto ha ahaatee... Haddii faraha nalooga qaadi lahaa jirka bani'aadamka oo nala oranlahaa "Noloshiina idinku maamusha", dhammaanteen waxaanu ku dhiman lahayn kuna burburi lahayn daqiiqado gudahood. Keliya waxaa nagu filan inaan ogaano inaanu nahay kuwa seexanaya – oo hurdo ka maarmin – ee haddaba yaa qalbiga hawshiisa maamulaya saacadaha aan hurudno? Hayeeshe qalbigaagu wuu shaqaynayaa adoo hurdaya iyo adigoo soo jeedaba.Sidoo kale kellidaadu waxay shaqanaysaa adoo soo jeeda iyo adoo hurdaba.Waxaa sidaas oo kale u shaqeeya shey kasta oo nolosha bani'aadamka ka mid ah ama xubin kasta oo jirkiisa ku taalla uu garanayo ama aanu garanayn. Maalin kasta culumadu waxay helayaan cilmi cusub oo ku saabsan habkuu u shaqeeyo wadnuhu, habka ay xubnaha jirka bani'aadamku u shaqeeyaan, habka unuggu u shaqeeyo iyo habka dhiiggu u shaqeeyo. Maalin kasta wax cusub ayay helayaan isla markaana iyagoo la yaaban sida qotada dheer ee loo sameeyay una shaqayso iyo sida qotada dheer hadane loo fududeeyay, markaasey isweydiinayaan sidee waxaan saas u habeysan ku socdaan? Arrinkaas haddii bani'aadamka loo xil saari lahaa insaan dunidaan korkeeda kuma noolaadeen.

Bani'aadamku waa qayb ka mid ah xeerkan guud ee aduunka ka jira oo sidaan arkayno qorraxda, dayaxa iyo xiddiguhu waxaa wada xeer iyaga ku gaar ah. Marna lama arag qorraxdii oo hawsheeda khalad galay ama dayaxa oo isna khaldamay ama xiddigaha oo iyaguna uu wareer galay ee dhammaantood waxay ku socdaan hab nidaamkiisu aad u qoto dheer yahay. Udub dhexaad adduunka markii la joogo boqol sannadoodba wuxuu durkaa in yar oo iyana qiyaasan, isbeddel ku tusaya xisaab weyn oo xeeldheer.

Haddaba arrintani waa mid weyn. Jiritaankan oo sidaa lagu fasiraa waa kan keliya ee cilmi ku dhisan. Waa fasiraad adag oon gilgilasho lahayn oo aan loo soo helayn meel daloosha oo u baahan gufeyn. Waa fasiraad aad u cad. Aragtidani waa sida keliya ee caqli-galka ah ee jiritaankan lagu arkayo iyo nolosha taalla adduunkan waana aragti bani'aadamka ku xiraysa asal sugan oo uu garan karo, kuna liibaanayo, fidradiisana la jaanqaadaya. Fasiraad kasta oo taa ku duwan uma suurto-gelinayso bani'aadamka waxaasoo dhan. Haddaad doontid waxaad akhrisataa kutubta ay qoreen nimanka falsafadda ka hadla iyo kuwa kale ee jiritaankan wax ka qoray. Sida aad doontid u akhri. Waxaad arki doontaa adoo naftaadu aanay ku deggenayn kuna qanacsanayn raallina ka ahayn fasiraadahaa dhammaantood marka laga reebo midda Allaah xaggii ka timid mooyee. Fasiraadaas fudud ee aan bani'aadamka wareerinaynlana aadayn fikrado iyo falsafado habawsan oo badankood aan la fahmi karin oon caqli-gal ahayn isla markaasna aan haysan qiil ama daliil. Iyadoo fasiraadda Islaamka ee jiritaankani tahay fasiraad caqli-gal ah, fudud, aad u cad yahay fahamkeedu, lana socon karta abuurta bani'aadamka.

Macno kale oo ka mid ah macnayaasha markaan leenahay (kawniyah) sidaan ka fahamnay diintan Islaamka iyo nolosha aan noolnahay waa tan Allaah leeyahay:

﴿ إِنَّ رَبَّكُمُ اللَّهُ الَّذِي خَلَقَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ فِي سِتَّةِ أَيَّامٍ ثُمَّ اسْتَوَى عَلَى الْعَرْشِ يُغْشِي اللَّيْلَ النَّهَارَ يَطْلُبُهُ حَثِيثًا وَالشَّمْسَ وَالْقَمَرَ وَالنُّجُومَ مُسَخَّرَاتٍ بِأَمْرِهِ أَلَا لَهُ الْخَلْقُ وَالْأَمْرُ تَبَارَكَ اللَّهُ رَبُّ الْعَالَمِينَ ﴾ [الأعراف: ٥٤]

"Rabbigiin waa Allaah, kan ku abuuray Samooyinka iyo Dhulka lix maalmood kuna ekaaday carshiga, habeenka ayuu daboolsiiyaa maalinta iyagoo si deg deg isku daba socda, Qoraxda, Dayaxa iyo Xidigahana waa kuwa ku sakhiran amarka Allaah, Allaah baa Abuuridda iyo amarkaba iska leh,waxaana waynaaday oo kheyrbatay Rabigga caalamka oo idil"
(Al-Acraaf: 54).

Xaqiiqdani waa mid aad u fudud,wax kasta oo Allaah abuuray waxay ku socdaan Allaah amarkii, Rabbiga aduunkaan oo idil. Arrintaan waa mid fudud kumana jiro wax halxiraale ah ama mugdi ah,ama aan la fahmayn oo adag.

# Aadanuhu waa qayb ka mid ah Kownka

Ustad Sayid wuxuu leeyahay **"Bani'aadamkuna wuxuu ka tirsan yahay jiritaanka addunkaan, xeerarka abuurtiisa ka taliyana kama baxsana xeerkaas guud ee jiritaanka oo idil ka taliya. Allaah ayaa abuuray bani'aadamkan siduu u abuuray jiritaankan dhammaantii"**

Waa xaqiiqo fudud oo aan lahayn wax murugsan lana fahmi karin. Ma jiro wax Allaah ku wayn samayntiisa ama Allaah ku adag abuuristiisa wuxuu doono ha ahaadee. Allaaha bani'aadamka abuuray sidoo kale waa kan jiritaankaana abuuray.

Ustad Sayid wuxuu leeyahay **"Bani'aadamka wuxuu ka samaysan yahay ciidda dhulka (dhoobada), haddanasifooyinka hibada ah ee uu Allaah siiyay ayaa ka dhigay insaan jira oo la sharafay waana deeq ama risqi Allaah oo bani'aadamkaas si qiyaasan u siiyay. Bani'aadamku marka laga eego dhinaca samayska jirkiisa wuxuu yahay mid u hoggaansan xeerka Allaah u dejiyay – iyadoon loo fiirinayn raalinoqoshadiisa.Jiritaankiisa iyo abuuristiisaba waxaa siiyay Allaah doonistiisa, ee maaha doonista waalidkii, maxaa yeelay waalidku way kulmeen oo keliya mana lahayn awood inay ilmaha caloosha ku jira siiyaan jiritaan ama abuuris, balse bani'aadamka wuxuu dhalanayaa isagoo raacaya xeerkii uu Allaah u dhigay oo ay ka mid tahay muddada uu uurka ku jiro iyo xaaladaha dhalashada uu maraayo. Wuxuu neefsanayaa hawada uu Allaah qiyaas go'an ku eheysiiyay. Wuxuuna u neefsanayaa intii Allaah u qoondeeyay iyo habkii uu Allaah ugu talo galay. Sidoo kalena bani'aadamku wuu xanuunsadaa oo waxna wuu dareemaa, wuuna dhergaa oo gaajoodaa, wuuna cunaa oo cabaa, guud ahaan wuxuu ku nool yahayxeerkii Allah u dejiyay isagoo doonis iyo ikhtiyaar midna u lahayn,sida kownka intiisa kale iyo wax dhexyaal ay si dhammaystiran ugu hoggaansan yihiin doonista, qaddarka iyo xeerarka Allaah''.**

Haddaba bani'aadamku waa inuu dareemo xaqiiqadan fudud, mana aha inuu u dul maro si aan qoto dheerayn ama yaraysi ah, ee waa inuu kor istaagaa, oo uu rogrogaa, lana noolaadaa, oo uu dareemaa inuu yahay qayb ka mid ah kownkan ee uu Allaah doonay inuu abuuro. Bani'aadamku waa qayb ka mid ah aduunkan iyo jiritaanka, xeerarka xukuma bani'aadamkuna ma aha mid ka go'an xeerarka kale ee xukuma jiritaanka intiisa kale. Sidaasi ayaanu ku dareemaynaa in jiritaankani yahay hal mid ah oo is-haysta oo isku wada xiran kuna yimid doonistii Allaah.

Ustad Sayid wuxuu leeyahay **"Allahii abuuray adduunkan oo bani'aadamkana abuuray, kana dhigay mid u hoggaansan xeerarkiisasida maakhluuqaadka kale, ayaa bani'aadamka u**

**jideeyay shareeco nidaamisa nolosha uu khiyaarka u leeyahay iyadoo lan jaanqaadaysa noloshiisacaadiga ah ee uusan khiyaar ama doorasho u lahayn."**

Bani'aadamkan wuxuu u hoggaansan yahay xeerka guud ee ay u hoggaansan yihiin adduunkan intiisa kale, inkastoo oo uu kownka dhamaantiis la wadaagin bani'aadamka tilmaamaha gaarka ah ee uu Allaah siiyay kuna sharfay taasoo ah inloo qaddaray inuu kala dooran karo xumaan iyo samaan iyo waddada uu doono inuu qaadi karo. Taas oo macnaheedu yahay inuu aadanuhu leeyahay dhinac uu wixii uu doono samayn karo oo khiyaar u leeyahay iyo dhinac kale oo uu kala siman yahay kownka intiisa kale oo uu khasab ugu hoggaansan yahay dhinacna uga baxsan karin xeerarkaa Allaah u dejiyay.

Haddaba bal ka warran dhinacaan uu bani'aadamku awoodda ugu leeyahay kala doorashada.

Dhinacan uu bani'aadamku ku leeyahay wax kala doorashada,wuxuu Allaah u jideeyaay shareeco nadaamisa noloshiisa khiyaarka loo siiyay kuna sargo'an noloshiisa caadiga ah. Macnaha shareecada nolosha insaanka loo dejiyay waxay waafaqsan tahay nadaamka kowniga ah ee xukuma insaanka qaybta noloshiisa ka mid ah ee aanu ikhtiyaarka u lahayn. Xeerka haga qeybta nolsha uusan khiyaarka u lahayn waa isla xeerka haga kownkaan oo dhan si isku sargo'an. Sidaa darteed shareecadan waxay la jaan qaadaysaa xeerarka guud ee kownkaan Allaah ku xukumo.

## Shareecadu waa qayb ka mid ah Nidaamka Allaah

Ustad Sayid wuxuu leeyahay **(Shareecadu marka dhinacaa laga eego waa qayb ka mid ah xeerkii guud ee Allaah u dejiyay abuurka bani'aadamka iyo tan kownka guud ahan wuxuuna isug dubbaridayaa si midaysan).**

Macnahani waa mid cusub oo sarreeya oo aanay sahlanayn in dadku gartaan oo faahmaan. Shareecadu waa xeerka guud ama qayb ka mid ah xeerka guud ee adduunka maamula. Allaah waa awooday inuu ka yeelo aadanaha mid ku qasban inuu raaco xeerka guud sida uu ka yeelay geedaha, xayawaanka, malaa'ikta iyo wixii aan noolayn kuwo ku qasban inay raacaan xeerkaa guud iyagoon lahayn doonis ama wax kala doorasho iyo fekerid. Haddaba markuu Allaah ku gaar yeelay aadanaha awooddan ah inuu xor u yahay inuu wax kala doorto oo uu kaddibna shareeco usoo dejiyay, shareecadaasi waa mid qayb ka ah xeerka guud ee Allaah u dejiyay inuu adduunka ku maamulo taasoo bani'aadamka usiisay awood inuu wax kala doorto isagoo xor ah. Dhinaca kalena haddii bani'aadamka loo diiday inuu u yahay xor inuu isagu maamulo xubnaha jirkiisa sida qalbigiisa, calooshiisa, dhiiggiisa ama maskaxdiisa, waxa sidaa loo yeelay si aanay nolosha bani'aadamku u baabi'in. Iyadoo dhinaca kalena bani'aadamka la siiyay xorriyad uu wax ku kala doorto taas oo ay ka dhalanayso mas'uuliyadda berri bani'aadamka la waydiin doono oo lala xisaabtami doono, waxaana arrintaa ka dhalanaya khayr ama shar nolosha bani'aadamka ku dhaca hadba waddada uu bani'aadamka maro awgeed.

Macnahani waa mid aad u sarreeya oo aad u cusub haddii la garto aragtidan taasoo ay ka dhalanayso in bani'aadamku ka mid yahay jiritaankaan intiisa kale iyo xeerka maamulaya, sidaa darteedna bani'aadamku marnaba uusan dareemayn inuu yahay mid ka duwan jiritaanka intiisa kale balse inuu yahay mid loo abuuray sida jiritaanka intiisa kaleba loo abuuray oo uu dheer yahay mas'uuliyaddan uu cuslaystay dhulka, cirka iyo buuruhu oo uu bani'aadamku qaaday, oggalaaday kalana kulmay arrintaa dhibaatooyin,sarena ugu kacay oo uu qiime weyn ku yeeshay iyada darteed. Haddaba dhinacan uu Allaah u gartay bani'aadamka inuu xornimo

wax ku kala doorto waa mid doonistii Allaah ku timid, waana fursadda bani'aadamku darajooyinka ugu sareeya ku gaaro ama god iyo darajo hoose ku shalwado.

Ustad Sayid wuxuu leeyahay **(Ma jirto kalimad ka mid ah kalimaadka Allaah, ama amar lays farayo ama mid layska reebayo ama yabooh dadka loo ballan qaadayo ama gooddin dadka loogu gooddinaayo ama sharci la dejiyay ama tusaalayn; illaa hadhuu jiro waa mid ka mid ah xeerka guud ee Allaah kownkaan u dejiyay, waana mid rumaynaysa xeerarka loo yaqaan kuwa dabeecadda, kuwaasoo aan arkayno mar kasta iyadoo hirgelaysaa iyadoo uu asalka dabeecaddeeda ku jiro xaqii soo-jireenka ahaa ee uu Allaah dhex dhigay. Waxayna ku hirgelaysaa Allaah qaddarkii).**

Macnahan way adag tahay inuu bani'aadamku hadal ku sheego, hayeeshee wuxuu awoodaa inuu la noolaado oo uu ku fekero halkaasoo uu dareemayo inaanay shareecadu ahayn oo keliya waxyaabo lays farayo ama layska reebayo oo qayaxan ee waa xeer ka mid ah xeerarka Allaah, lana socda xeerka guud ee Allaah u dejiyay adduunkan ee ma aha xeerar Allaah u gaar yeelay bani'aadamka.

Marka ay qawaaniintaasu hirgalayso dabeecadda xaqa ah ee soo jireenka ah ee Allaah u yeelay darteed; maxaa yeelay cilmiga Allaah waa idilkoob qaddiim ah,doonistiisuna waa qaddiim, mar hadday ku dhaqangelayso inta xaqa ah ee soo jireenka ahaa ee Allaah dhexdhigay waxay ku dhaqan gelaysaa qaddarka Allaah iskama hirgashee qaddarka Allaah baa hirgeliya. Waxay ku xiran tahay doonista Allaah ee wax kasta goysa waqti walba. Mar walba shareecadu qaddarka Allaah baa ugu deeqa awood ay ku socoto kuna camal fasho. Sidaas buu insaanku ugu xirnaanayaa mar walba xeerarkaa kowniga ah, ma jiraan wax noloshiisa ka mid ah oo soconaya ka warqabid iyo ilaalin la'aan.

Ustad Sayid wuxuu leeyahay **(Shareecada uu Allaah u dejiyay inay nolosha aadanaha nidaamiso waa "Shareeco Kawni ah";maxaa yeelay waxay la xiriirtaa xeerka guud ee kownaka lana jaanqaadaysaa).**

Waana taa sababta uu Ustad Sayid shareecada ugu magacaabay "Kawni" waayo xeerarka shareecada Islaamka iyo waxa ku jira oo dhan – wax lays farayo ama layska reebayo, balanqaad ama gooddin, sharci-dejin ama tusaalayn – waa qeyb ka mid ah xeerka guud ee Allaah iyadoo ku sifaysan dhammaan waxa ay ku sifaysan yihiin xeerarka kale ee guud ee wada jiritaankan dhammaantiis, sidaa darteedna waa shareecokowniah;waayo waxay xiriir la leedahay xeerarka guud kowniga ah lana jaanqaadaysaa.

Ustad Sayid wuxuu leeyahay **(Sidaa darteed in Shareecada Islaamka lagu dhaqmaa waxay lagama maarmaan u tahay in laga dhabeeyo sidii laysu waafajin lahaa nolosha aadanaha iyo dhaqdhaqaaqa adduunka uu ku nool yahay).**

Arrintani waa mid si caadi uga dhallanaysa arrinkii lasoo sheegay. Hadii uu aadanuhu yahay makhluuq uu Allaah abuuray sida uu u abuuray jiritaanka intiisa kale, isla markaana yahay qayb ka mid ah jirtaanka adduunkan, waxaa lagama maarmaan ah in uu bani'aadamku u hoggaansamo xeerka keliya ee adduunkan maamulayay.

Hayeeshee bani'aadamkii wuxuu leeyahay dhinac Allaah u hoggaansan oo aan lahayn doonis u gaar ah oo xor aan ahayn, dhinacna waa dhinac uu u leeyahay doonis iyo inuu xornimo wax ku kala doorto, waxa sidaa darteed lagama maarmaan in labadaa dhinacba ay noqdaan kuwo u wada hoggaansan hal xeer (Allah xeerkiisa).

Hadday tahay Shareecada Islaamku tii nidaaminaysay aadanaha dhiniciisa uu u leeyahay wax kala doorashada, waxaa lagama maarmaan ah inay shareecadaas noqoto mid la jaan-qaadaysa xeerka guud ee Allaah adduunka ku maamulayo. Waa inay noqotaa shareeco adduunkoo dhan leeyahay sida ay xeerarka kale ay u yihiin xeerar aduunkoo dhan leeyahay maxaa yeelay waa shareeco Allaah aduunkoo dhan usoo dejiyay sida ay xeerarka kaleba u yiihin kuwo adduunkoo dhan loosoo dejiyay.

Ustad Sayid wuxuu leeyahay **(Shareecada oo lagu dhaqmaa waxay ka dhalanayaa baahida loo qabo in la xaqiijiyo isla jaan qaadka nolosha insaanka iyo dhaqdhaqaaqa kownkan uu ku dhex nool yahay).**

Taasi waa natiijada caadiga ah, insaanku waa makhluuq sida kownkan u yahay makhluuq, waana lama huraan inuu insaanku ka dambeeyo u hoggaansanaado xeerarka kala wada kownkaan.

Insaanku dhanna wuu ka hoggaansan yahay ikhtiyaar la’aan, dhanna ikhtiyaar baa loo siiyay, haddaba waa in labadiisa qeybood ay u wada hoggaansanadan hal xeer.

## Isla jaanqaadka Nolosha Aadanaha iyo Kownka

Mar haddii ay shareecadu hagayso qeybta uu isnaanku doorashada u leyahay, waa inay taasi noqotaa mid la jaanqaadaysa xeerarka guud ee kownkan, macnahu waa inay shareecaduna noqotaa mid kowni ah sida qawaaniinta kaleba u tahay qawaaniin kowni ah.

Wuxuu ustaad Sayid leeyahay: **(ku dhaqanka shareecadu waxa uu ka dhalanayaa lagama maarmaannimada iswaafajinta nolosha insaanka iyo dhaqdhaqaaqa kownkan uu ku nool yahay, balse waxay lama huraan u tahay xaqiijinta is waafajinta qawaaniinta xukunta fidrada insaanka ee qarsoon iyo tan xukunta nolosha muuqata, iyo baahida loo qabo isu soo dumidda shakhsiyadda duugan iyo tan bannaan yaalka ah ee insaanka).**

Hadalkani waa mid aad u qiima badan; maxaa yeelay wuxuu si cad oo fudud u tilmaamayaa siday lagama maarmaanka u tahay in shareecada lagu dhaqmo, maxaa yeelay shareecadu ma aha keliya amarro Ilaahi ah,ama awoodda iyo xukumidda Ilaahiga ah, balse waxay tahay damaanad-qaadis in aadanuhu ku noolaado nolol wanaagsan oo deggan oo waafaqsan jiritaanka intiisa kale ee uu la nool yahay aadanuhu. Shareecadaas oo lagu dhaqmaana waxay ka dhalanaysaa lagama maarmaannimada inay is waafaqaan nolosha aadanaha iyo adduunka intiisa kale.

Ustad Sayid wuxuu leeyahay **“Waxay lagama maarmaan u tahay in laga dhabeeyo inay is waafaqaan xeerarka xukuma fidrada aadanaha iyo xeerarka xukuma noloshiisa inta muuqata iyo siday lagama maarmaanka u tahay inay isla-qabsadaan oo ay midoobaan damiirka aadanaha ee qarsoon iyo tan muuqataba”.**

Waxaasoo dhan aadanuhu wax badan kama oga.

Ma awoodo aadanuhu inuu koobo adduunka dhaqdhaqaaqiisa iyo xeerarka wada,sidaa darteed keligii ma awoodo inuu u dejiyo noloshiisa mad’hab ama sharci waafaqsan xeerarka kale ee adduunka,waayoo bani’aadamku waxba kamayaqaan xeerarka adduunka, hadduu keligii isku dayo inuu noloshiisa u degsado shareeco nidaamisa dhinaca uu khayaarka u leeyahay kana hor-imaanayn xeerarkii kale ee adduunka ma awoodi karayo waayowuxuusan garanayn qawaaniinta kowniga ah, kolkaasuu keenayaa wax naaqus ah amaba khaldan.

Sidoo kale ma garanayo xeerarka xukumo nolosha inta qarsoon iyo waxa ku habboonuna fiican noloshiisa inta muuqata.

Garashada la garto wax kasta oo ka dhex dhaca jirkeena gudihiisa oo dareen ah xataa xeerarka xukuma xubnaha jirkeenna ee uu cilmigu dhawaanahan soo ogaaday siday ugu xiran yihiin dhinaca dareenka nafta bani'aadamka, marna ma aha xubnaha jirka iyo dareenka naftu kuwa kala baxsan oo labadoodu way isu furan yihiin. Dhinaca xubnaha wuxuu saamayn ku leeyahay dhinaca dareenka, isla markaana dhinaca dareenku wuxuu saamayn ku leeyahay dhinaca xubnaha jirka, labadooda oo laysku daray waxay wada sameeyaan ama qaabeeyaan aadanaha dhaqankiisa muuqda.

Haddii uu bani'aadamku aanu aqoon buuxda u lahaan karin siday xubnihiisa u shaqeeyaan ama sida uu wax u dareemo, hadduu saas wax u ogeyn marna awood u malaha inuu shareeco u dejiyo noloshiisa inta muuqata, haddana is waafajin u sameeyo nolashiisa inta qarsoon iyo inta muuqataba, ama jiritaanka intiisa kale. Arrinkaas waa wax aan marnaba suurta gal ahayn… inuu aadanuhu garto dhammaan waxa isaga naftiisa (tan qarsoon iyo tan muuqataba) ku wareegaya iyo waxa dadka kale oo idil naftoodu ku fekerayso oo uu kaddibna ka dhigo kuwii is-waafaqa una dejiyo shareeco isku nidaamisa gebigood (waa wax aan suurta gal ahyan).

Su'aasha ah "Ma awoodaa bani'aadamku inuu keligii degsado nidaamkii uu naftiisa ku hagi laha isagoo waliba jaahil ka ah dhinacyo badan; sida xeerarka adduunkani ku taagan yahay, ama xeerarka bani'aadamka naftiisu ku socoto (dhinaciisa muuqda iyo kan qarsoonba) iyo noolaha intooda kale?" Jawaabtu waa:Arrintaas waa mid aan marnaba suurta gal u ahayn bani'aadamkan oo intaas oo idil jaahilka ah oo weliba taagta daran inuu u dejiyo shareeco.

Ustaad Sayid wuxuu leeyahay: **(Maadaama uusan bani'aadamku awoodin inuu garto dhammaan xeerarka caalamku ku socdo iyo xeerarka fidradiisa maamula una hoggaansan tahay (ama ha oggolaado ama ha diido), waxaa halkaa ka cad inaanu bani'aadamku awood u lahayn inuu noloshiisa u dejiyo sharci is waafajinaya nolosha bani'aadamka iyo adduunka intiisa kale ama xataa is waafajin kara fidrada bani'aadamka ee qarsoon iyo midda noloshiisa ee muuqata. Arinkaa waxaa awoodo oo keliya Abuurihii abuuray adduunkan iyo bani'aadamkan, isla markaana asaga uun maamulaya arrimaha noolaha oo idil, kuna maamulaya xeer uu u dejiyay raallina uga noqday).**

Arrintaasi waxay bani'aadamka si adag oo la fahmi karo ugu xiraysaa Ilaahnimada Allaah sida qofka baahan ee faqiirka ahi uu ugu xiran yahay kan awoodda leh ee deeqtoon.

Halkaasna waxaa ku dhaboobaya hadalkii uu Allaah yiri:

﴿ يَا أَيُّهَا النَّاسُ أَنْتُمُ الْفُقَرَاءُ إِلَى اللَّهِ وَاللَّهُ هُوَ الْغَنِيُّ الْحَمِيدُ ﴾ [فاطر: ١٥]

"Dadow idinka unbaa faqiiriinu ah Allaah, Allaahna waa hodan la mahadiyo" (Faatir: 15)

Kaas ayaa ah faqriga dhabta ah. Faqriga uu aadanuhu waqti kasta u baahan yahay abuurihiwax kasta aqoonta u lahaa, deeqsiga ahaa, naxariista badnaaadoomidiisana aqoonta u lahaa, una naxariisanayay, u kaalmaynayay, noloshoodana u nidaaminayay oo isu waafajinaya noloshooda iyo adduunka intiisa kale,ugana raaxeeyay inuu ka fekero inuu shareeco degsado.

Sidaa darteed ku dhaqanka shareecada Allaah wuxuu noqonayaa lagama maarmaan oo waajib ah si loo helo is waafaqsanaantaas – isagoo markiisa horeba ah waajib si loo dhaqan geliyo diinta Islaamka caqiiddo ahaan – oo markaa ayay isla jaan qadayaan caqiiddada, nolosha

bani'aadamka midda muuqata iyo tan qarsoonba, bani'aadamkuna marna ma noqonayo addoonkii Allaah ilaa uu shareecadaas qaato una hoggaansanaado.

Mana awoodo bani'aadamku inuu noloshiisa isu duwo oo uu maamulo illaa inuu shareecada Allaah ku dhaqma mooyee. Sidaa darteed shareecada Allaah waa shareecada adduunkoo dhan ku habboon maxaa yeelay waxay bani'aadamka ku xiraysaa Allaah oo ah abuurihii jiritaankan sido kale waxay kaloo ku xiraysaa bani'aadamka aduunkan uu qaybta ka yahay, kaddibna waxay ku xiraysaa aadanaha intiisa kale oo isaga la midka ah, kaddibna waxay suurta galinaysaa inay iswaafaqaan oo ay midoobaan dhexdooda. Halkaas oo uusan noqonayn ku dhaqanka shareecada Islamku mid ku kooban arigtidaas dusha sare ah ee dad badani u fahamsan yihiin inay tahay oo keliya amarkii Allaah oo la raacayo iyowaajib la soo faray.

Arrinku sidaas ma aha… Arrinku intaa wuu ka weyn yahay oo ka ballaaran yahay oo ka cajab badan yahay waxayna tahay in addoomihii oo iyagoo raalli ah ku dhaqmaya shareecadii Rabbigood maxaa yeelay shareecadan ayaa ah tii keligeed is waafajinaysay noloshooda iyo Rabbigood iyo sidoo kale noloshooda iyo kownka intiisa kale iyo noolaha ku nool iyo aadanaha dhammaantood. Macnahaas xeesha dheer ee cajiibka ah waa macnaha inay shareecadani tahay mid kownka oo idil loogu tala galay. Sidaa darteed Ustad Sayid wuxuu leeyahay **(Ku dhaqanka shareecada Islamku waxay noqonaysaa waajib si loo helo is waafaqsanaantaas – kasakow ahaanshihiisa in uu waajib yahay si loo dhaqan-geliyo Islamka caqiiddo ahaan. Islaamku kama jiraayo oo ma u sugnaanin qofka noloshiisa ama dadka noloshooda illaa in Allaah keligii la caabudo mooyee oo laga qaato habkii loo caabudi lahaa rasuulkiisii Muxamad SCW ahaa, taaso laga dhabaynayo tiirka kowaad ee Islamka oo ah "Laa Illaaha IllaLaah" iyo "Muxammad (SCW) yahay Rasuulkii Allaah" iyo sido kale in la helo is waafaqsanaan buuxda oo u dhaxaysa nolosha aadanaha iyo xeerka nolosha adduunkani ku socdo, taas oo uu ugu jiro bani'aadamka khayr dhammaantii iyo nolosha aadanaha oo laga ilaaliyo fasaadka).**

Dhaqan-gelinta caqiiddo ahaan in bani'aadamka iyo jiritaanka adduunka ay is waafaqsanaan joogta ahi dhexdooda noqoto iyo in laga dhabeeyo addoonimadii Allaah loo ahaa iyadoo laga ambaqaadayo fahamka "Laa Illaaha IllaLaah" iyo "Muxammad (SCW) yahay Rasuulkii Allaah", waa mid siinaya towxiidka macno weyn oo ay lagama maarmaan tahay in dadku gartaan. Ma ahan towxiidku hadal ama sheegasho maran. Hayeeshee, si ay u hirgeliyaan addoonimadii dhabta ahayd waa inay "Laa Illaaha IllaLaah" ku fahmaan macnahaas weyn ee xeesha dheer ee dhammaystiran kaas oo noloshooda ku yeelanaya saamayn.

## Miraha ka dhasha Isla jaanqaadkaas

Intaa kaddib Ustad Sayid Qudub wuxuu caddeynayaa miraha ka dhalanaya is waafajinta nolosha aadanaha iyo nidaamka adduunka maamula **(Khayr dhammaantii ayaa ugu jira bani'aadamka hirgelinta is waafaqa dhex mara nolosha aadanaha iyo xeerka adduunka, iyo in nolosha bani'aadamka laga ilaaliyo fasaadka… Marka sidaa la gaaro ayay dadku ku noolaanayaan nabadgelyo ka dhex dhalata naftooda…)**

Markay dadku ku hoos noolyihiin nidaam ama shareeco aan ahayn tii Islaamka lagama yaabo inay nabadgelyo ku noolaadaan.

Nabadgelyada nafta waa mid la garan karo; maxaa yeelay waxaa is waafaqaya waxyaabaha ay naftoodu doonayso ama ay jeceshahay ama ay hiigsanayso iyo shareecada Islamka, ma jirayaan

loollan iyo kal gogi'id nafta dhexdeeda ah, balse qofku wuxuu ku noolaanayaa nolol is aaddan is rabta oo keenta liibaan iyo farxad.

Wuxuu leeyahay Ustad Sayid Qudub: **(Nabadgelyada ka dhex dhacaysa nafta bani'aadamka iyo adduunka ku hareeraysan waxay ka dhalanaysaais waafaqsanaanta dhaqdhaqaaqa nafta bani'aadamka iyo kan adduunka oo meel u wada jeeda).**

Markuu bani'aadamku dareemo inaanu keligii adduunkan ku ahayn oo uu la mid yahay noolaha kale ee Allaah abuuray sida qorraxda, dayaxa, xiddigaha, dabaysha, geedaha iyo xayawaanka oo ay dhamaantood isku waddo yihiin oo Allaah wada xusayaan.

﴿ سَبَّحَ لِلَّهِ مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَهُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴾ [الحديد: ١]

"Waxaa Allah u tasbiixsada oo ammaana dhammaan waxa ku sugan samaawaadka iyo dhulka, Allah waa adkaade falsan" (Al-xadiid: 1).

Cibaadada ayay Allaah u keli-yeelayaan isagayna isu wada dhiibayaan… Waxaa aan shaki ku jirin in arrintaasi saamayn weyn ku yeelanayso nolosha aadanaha naftiisa iyo wehelka uu ka helayo markuu dhex socda adduunka dhexdiisa isagoo dareemayo in wax kasta oo adduunkan ku nool uu yahay mid isaga saaxiib la ah oo ay walaalo ku yihiin cibaadada Allaah.

Sidaa darteed ma noqonayo bani'aadamkaas (sida dadka Allaah cadawgiisa ahi yihiin) mid dareensan inuu markasta la hardamayo adduunka intiisa kale, ama Allaah loollan kula jira. Markay sidaa u nool yihiin waxay ku nool yihiin ciriiri iyo cadaab.

Qofka muslimka ahi markuu keligii lama-degaanka (saxaraha) socdo ma dareemayo inuu keli yahay. Wuxuu dareemayaa in ciidda uu ku kor socdaa ay Allaah xusayso, buuraha,hillaaca, onkodka, geedka iyo roobka uu arkayo dhammaan inay Allaah ammaanayaan. Sidaa darteed marna ma dareemayo inuu keligii yahay mana qaloonayo oo wuxuu dareemayaa inuu yahay addoon Allaah oo jiritaanka intiisa kale ula hadlayaa sidii addoomo siman.

Markuu bisha dhalatay arko wuxuu dhahaayaa "Rabbigaa iyo Rabbigay waa Allaah". Dareenkaas ayuu kula noolaanayaa noolaha intiisa kale. Markuu cuno miro geed lagasoo guray wuxuu dareemayaa inay mirtaa dhawaan Allaah xaggii ka timid. Markuu roobka dhibcihiisa arko iyadoo saafi ah ayuu wejigiisa ku masaxayaa isagoo dareensan inay dhawaan xagga Allaah ka timid. Sidaas ayuu wehel u dareemayaa oo uusan marnaba keli dareemayn xataa hadduu keligii god ku jiro maxaa yeelay waa kii marka kasta Allah la jooga, Allaahna marna ka tegi-maayo oo Allaah waa kii bani'aadamka uga dhaw xididka halbawlaha. Sidaa darteed marna qofku ma dareemayo kelinimo iyo qaloosho oo wuxuu dareemayaa inuu yahay mid Allaah aad ugu dhaw oo aan ahayn mid baqa ama welwela sida ay dadka kale yihiin.

Wuxuu leeyahay Ustad Sayid Qudub: **(Nabadgelyada qofka naftiisa iyo isaga dhexmartaa waxay ka dhalataa is waafaqidda dhaqdhaqaaqa qofka iyo fidradiisa ee asaga dhaqaajisa. Sidaa darteed ma jirto wax iska-hor-imaad qofka iyo fidradiisa maxaa yeelay shareecada Allaah ayaa si fudud isu waafajinaysa dhaqdhaqaaqa qofka ee muuqda iyo kan qarsoon. Iswaafajintaasi waxaa ka dhalanaysa is waafajin kale oo dhex marta dadka xiriirka dhexdooda ah iyo dhaqdhaqaaqooda guud; maxaa yeelay waxay noqonayaan kuwo hal waddo ku wada taagan wuxuuna qeyb ka yahay xeerka guud ee adduunka maamula).**

Waxaan shaki lahayn in marka ay jamaacada muslimiinta iyo bulshada Islmaamka ah ama guud ahaan aadanaha oo idil marka ay u wada hoggaansamaan xeerka guud ama shareecadaAllaah, markaas waxa aan shaki ku jirin in aanu dhacayn is-qabsi ama in laysu

caroodo ama dagaal, balsewaxaanu arki doonaa – sidii hadda ka hor aanu u aragnay ummaddii Islamka ee ugu horreysay – dad wada nool iyagoo is jecel oo isu ducaynaya oo isu kaalmaynaya oo isu naxaya maxaa yeelay ummadda Islamku waa sidii hal qof jirkii oo haddii xubin ka mid ahi xanuunsato ay xubnaha kale dhammaantood ula dareemayaan xummad iyo dhafar. Dareenkaas midaysan wuxuu farxad, degganaan iyo raaxo dhex dhigayaa dhammaan ummadda Islamka markay dhammaantood u wada hoggaansamaan shareecada Allaah ee adduunka.

Hadba qaddarka dadku shareecada Allaah ku khilaafaanoo garab maraan ayaa loollankadhexdooda ah la ekaanayaa. Haddii ay mukhaalafaduyar tahaywaxaa yaraanaya loollanka dhexdooda ah, Hadduu batana waa sidoo kale. Haddii ay noloshoodu dhammaan ka tagto shareecadii Allaah waxay isu rogaysaa mid la mid ah tan duur-joogta iyo dugaagga aan isu naxariisan.

Iswaafaqaa dadka dhexdooda ahaada kaddib markay u hoggaansameen shareecada Allaah ayaa wuxuu siinayaa nolosha macno sarreeya oo leh ammaan iyo farxad dhab ah, iyo horumar xagga wax-soo-saarka ah. Sidoo kale dadku maadaama ay adduunka intiisii kale is waafaqeen, waxay noqonayaan kuwo u adeegsanay aqoonta ay u leeyihiin xeerarka adduunka maamula dhinaca khayrka keliya. Waxyaabaha lagu ogaaday horumarka cilmigana waxay u adeegsanayaan wax ay ka kororsanayaan u dhawaanshaha Allaah iyo kororsi xiriirka Allaah iyo khayr usoo siyaada bani'aadamka. Markay cilmi ahaan usoo ogaadaan wax ka mid ah xeerarka adduunka maamula, waxay ogaanayaan cilmi cusub oo Allaah ku xiraya oo siyaadinaya xiriirka iyaga dhexdooda ahaaday. Sidoo kale waxay cilmigaas ka faa'iideysanayaan hawl-fududeyn ay waqti ugu helaan cibaado intii hore ka badan oo ay Allaah ku caabudaan kuna xusaan. Sidaasi ayaanu ku imaanaysaa is waafajinta dhex taalla iyaga, naftooda,iyo noolaha kale oo dhan. Markaas ayuu adduunka dhammaantii noqonayaa mid isla jaan qaada oo u wada jeeda hal jiho iyagoo xusaya Rabbigoodii abuuray wareer iyo welwel la'aan.

Ustad Sayid Qudub wuxuu leeyahay: **(Sidaas ayuu khayrku ugu hirgelayaa bani'aadamka marka uu ku hanuuno oo uu si fudud u garto kownka sirta ku duugan iyo awoodaha ku aasan iyo khayraadka ku jira gudihiisa iyadoo intaa dhammaan loo adeegsanayo si waafaqsan shareecada Allaah si khayrkii guud uu bani'aadamku u helo iyadoonay jirin wax iska-hor-imaad ah).**

Waa halkan meesha ay ka bilaabmayso ilbaxnimada bani'aadamka kor u qaadaysay ee nolosha u fududaynaysay una qurxinaysay,una fududaynaysay cibaadada iyo ku raaxaysiga nicmooyinka Allaah. Mana noqonayso ilbaxnimo wasakhaysan oo daba-geddisan sida ilbaxnimada qaawanaanta ee aynu maanta aragno, waxay noqonaysaa ilbaxnimo nadiif ah oo sharaf iyo ujeeddo leh, si fudud bani'aadamka kor ugu qaadaysa uguna raaxaynaysa nicmooyinkii Allaah ee waa-weynaa,ee Allaah xusuusinaysay.

﴿ وَإِنْ تَعُدُّوا نِعْمَةَ اللَّهِ لَا تُحْصُوهَا ﴾ [النحل: ١٨]

"Haddaad tirisaan nicmooyinka Allaah ma koobi kartaan" (Al-naxli: 18).

Markay dadku ku dhaqmaan shareecada Allaah ee adduunka oo dhan loogu tala galay waxaa u dhaboobaya nicmooyinkaas iyo barakooyinkaas oo idil.

﴿ وَلَوْ أَنَّ أَهْلَ الْقُرَى آمَنُوا وَاتَّقَوْا لَفَتَحْنَا عَلَيْهِمْ بَرَكَاتٍ مِنَ السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ ﴾ [الأعراف: ٩٦]

"Hadday dadka magaalooyinku rumeyn lahaayeenoo dhawrsan lahaayeen waxaan u furi lahayn barakada samada iyo dhulka…" (Al-Acraaf: 96).

**"Shareecada Allaah haddaan la raacin hawo bani'aadam baa la raaci:**

﴿ وَلَوِ اتَّبَعَ الْحَقُّ أَهْوَاءَهُمْ لَفَسَدَتِ السَّمَاوَاتُ وَالْأَرْضُ وَمَنْ فِيهِنَّ ﴾ [المؤمنون: ٧١]

"Hadduu raaco xaqu hawadooda waxaa fasaadi lahaa samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya…" (Al-Mu`Minuun: 71).

Ustad Sayid Qudub wuxuu leeyahay: **(Intaa dabadeed waxaa ah aragtida Islamka midaynaysaa xaqa ay diintani ku taagan tahay iyo xaqa ay ku taagan yihiin cirka iyo dhulku oo ay adduunka iyo aakhiradu ku hagaagayaan, Allaahna ku xisaabinayo kuna abaalmarinayo kuwa ku xad-gudba… waa xaqa midka ahaa ee aan lahayn wax labeeya, waana xeerkii guud ee uu Allaah ugu tala galay inuu adduunka maamulo waqti kasta, una hoggaansan yihiin wax kasta oo adduunka ku sugan).**

﴿ لَقَدْ أَنْزَلْنَا إِلَيْكُمْ كِتَابًا فِيهِ ذِكْرُكُمْ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ۞ وَكَمْ قَصَمْنَا مِنْ قَرْيَةٍ كَانَتْ ظَالِمَةً وَأَنْشَأْنَا بَعْدَهَا قَوْمًا آخَرِينَ ۞ فَلَمَّا أَحَسُّوا بَأْسَنَا إِذَا هُمْ مِنْهَا يَرْكُضُونَ ۞ لَا تَرْكُضُوا وَارْجِعُوا إِلَى مَا أُتْرِفْتُمْ فِيهِ وَمَسَاكِنِكُمْ لَعَلَّكُمْ تُسْأَلُونَ ۞ قَالُوا يَا وَيْلَنَا إِنَّا كُنَّا ظَالِمِينَ ۞ فَمَا زَالَتْ تِلْكَ دَعْوَاهُمْ حَتَّى جَعَلْنَاهُمْ حَصِيدًا خَامِدِينَ ۞ وَمَا خَلَقْنَا السَّمَاءَ وَالْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَا لَاعِبِينَ ۞ لَوْ أَرَدْنَا أَنْ نَتَّخِذَ لَهْوًا لَاتَّخَذْنَاهُ مِنْ لَدُنَّا إِنْ كُنَّا فَاعِلِينَ ۞ بَلْ نَقْذِفُ بِالْحَقِّ عَلَى الْبَاطِلِ فَيَدْمَغُهُ فَإِذَا هُوَ زَاهِقٌ وَلَكُمُ الْوَيْلُ مِمَّا تَصِفُونَ ۞ وَلَهُ مَنْ فِي السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَنْ عِنْدَهُ لَا يَسْتَكْبِرُونَ عَنْ عِبَادَتِهِ وَلَا يَسْتَحْسِرُونَ ۞ يُسَبِّحُونَ اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ لَا يَفْتُرُونَ ﴾ [الأنبياء: ١٠-٢٠]

"Waxaan idiin soo dejinnay kitaab dhexdiisa ay sharaftiinnu ahaatay, miyaydaan caqliyaysanayn. Badanaa qaryooyin dulmi falay oo aan halaagnay, oo aan abuurnay gadaashood qoomam kale. Markay dareemeen cadaabkeenni waaba ayagoo ka cararaaya. Ha cararina oo u laabta wixii laydinku faajfaajeeyay iyo guryihiinnii waxaad mudan tihiin in laydin su'aalee. Waxay yiraahdeen halaaggeennee! Waxaan ahayn daalimiin. Kama suulin qeyladooda ilaa aan ka dhignay wax la shafay oo basbeelay. Uma aynaan abuurin samada iyo dhulka iyo inta u dhexeysa cayaar. Haddii aan rabno madadaalo waan samaysan lahayn haddan falaynaba. Balse xaqa ayaan ku gannaa baadilka kolkaasu duminayaa waaba isagii oo baaba'ay, waxaana idiinku sugnaaday halaag waxa aad sifaynaysaan darteed. Allaah waxa uu leeyahay inta samada iyo dhulka joogta, addoomada agtiisa ahaadayna iskama weyniisiyaan cibaadadiisa kamana daalaan. Habeen iyo maalin bay u tasbiixsadaan kaman noogaan" (Al-Anbiya: 10-20).

Sidaas ayuu ku noqonayaa habka ay muslimiintu u noolyihiin isla xaqii ay ku istaagtay cirka iyo dhulku oo markaa uu dareemayo qofku in isaga iyo jiritaankan dhammaantii ay yihiin hal shay oo ku wada xiran Allaah. Waxaana magacyada Allaah ka mid ah inuu yahay "Xaq" iyo in sidoo kale jiritaankan dhammaantii lagu abuuray xaq. Cirka iyo dhulkana waxaa lagu abuuray xaq. Bani'aadamkana sidoo kale xaq ayaa lagu abuuray oo naf kastana waxaa lagu abaalmarin doonaa waxay galabsatay.

Dareenka bani'aadamku dareensanyahay in xaqa ay diinta Islamku ku istaagtay uu yahay isla xaqa ay ku istaagay cirka iyo dhulku waa arrin bani'aadamka si ku raaxaysi leh oo aad u macaan ugu xiraysa Allaah. Sidaa darteed wuxuu Allaah leeyahay:

﴿ لَقَدْ أَنْزَلْنَا إِلَيْكُمْ كِتَابًا فِيهِ ذِكْرُكُمْ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴾ [الأنبياء: ١٠]

"Waxaan idiin soo dejinnay kitaab dhexdiisa ay sharaftiinnu ahaatay, miyaydaan caqliyaysanayn" (Al-Anbiyaa: 10).

Kitaabkan Qur'aanka waxaa loo soo dejiyay in bani'aadamka kor loogu qaado oo jiritaankan dhexdiisa ku lahaado xusid sarreysa. Dadka kitaabkan qabsadaa waxay u kor noqonayaan derejo ilaa heer ay ka saramaraan tan malaa'igta, haddaba maxaa looga tegayaa kitaabkan oo xuduudihiisa loo dhaafayaa oo loo qabsan la'yahay isagoo ay ku jirto dadka sharaftooda iyo xuskooda iyo baraarahooda iyo badbaadadooda aakhiro iyo nimco gelistooda aakhiro?

﴿ وَكَمْ قَصَمْنَا مِنْ قَرْيَةٍ كَانَتْ ظَالِمَةً وَأَنْشَأْنَا بَعْدَهَا قَوْمًا آخَرِينَ ۞ فَلَمَّا أَحَسُّوا بَأْسَنَا إِذَا هُمْ مِنْهَا يَرْكُضُونَ ۞ لَا تَرْكُضُوا وَارْجِعُوا إِلَى
مَا أُتْرِفْتُمْ فِيهِ وَمَسَاكِنِكُمْ لَعَلَّكُمْ تُسْأَلُونَ ۞ قَالُوا يَا وَيْلَنَا إِنَّا كُنَّا ظَالِمِينَ ۞ فَمَا زَالَتْ تِلْكَ دَعْوَاهُمْ حَتَّى جَعَلْنَاهُمْ حَصِيدًا خَامِدِينَ ﴾
[الأنبياء: ١١-١٥]

"Badanaa qaryooyin dulmi falay oo aan halaagnay, oo aan abuurnay gadaashood qoomam kale. Markay dareemeen cadaabkeenni waaba ayagoo ka cararaaya. Ha cararina oo u laabta wixii laydinku faajfaajeeyay iyo guryihiinnii waxaad mudan tihiin in laydin su'aalee. Waxay yiraahdeen halaaggeennee! Waxaan ahayn daalimiin. Kama suulin qeladooda ilaa aan ka dhignay wax la shafay oo basbeelay." (Al-Anbiyaa: 11-15).

Kuwa Allaah la dagaalamayaa ma aha kuwa cadaabtiisa ka fakanaya maxaa yeelay Allaah kaddib markuu fahamsiiyay inuu usoo dejiyay kitaabka Qur'aanka si ay ugu kor noqdaan oo ay sharaf ku yeeshaan ayuu haddana cabsiinayaa – isagoo ku leh sida aanu magaalooyin hore u qabanay oo aannu gadaashood ummado kale u abuurnay ayaan maantana u awoodnaa wax kasta.

Sidaa darteed halkaas majiro meel loo cararo ama looga baxsado kama-dambaystaas dhibka badan – waxaa la leeyahay "Ku noqda wixii aad ku raaxaysan jirteen... Ku noqda adduunyadii wax kedinaysay... Ku noqda baashaalkii iyo ciyaartii.Mar dambe ayaa laydin weydiin doonaa. Waxay ugu dambeystii garawsadeen inay ahaayeen kuwo dembiilayaal ah.... Saasna kuma tagin qayladoodu intaan ka yeello, wax la shafay oo bakhtiya. Waxay ahaanayaan kuwo ku celceliya dareenkaas iyo garawshahaas hoogay ilaa laga aamusiiyo. Markaasuu Allaah ku celcelinayaa dhabta ah in cirka iyo dhulku aan loo abuurin macno-la'aan, baashaal iyo dheel-dheel.

﴿ وَمَا خَلَقْنَا السَّمَاءَ وَالْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَا لَاعِبِينَ ۞ لَوْ أَرَدْنَا أَنْ نَتَّخِذَ لَهْوًا لَاتَّخَذْنَاهُ مِنْ لَدُنَّا إِنْ كُنَّا فَاعِلِينَ ۞ بَلْ نَقْذِفُ بِالْحَقِّ عَلَى
الْبَاطِلِ فَيَدْمَغُهُ فَإِذَا هُوَ زَاهِقٌ وَلَكُمُ الْوَيْلُ مِمَّا تَصِفُونَ ﴾ [الأنبياء: ١٦-١٨]

"Uma aynaan abuurin samada iyo dhulka iyo inta u dhexeysa cayaar. Haddii aan rabno madadaalo waan samaysan lahayn haddaan falaynaba. Balse xaqa ayaan ku gannaa baadilka kolkaasu duminayaa waaba isagii oo baaba'ay, waxaana idiinku sugnaaday halaag waxa aad sifaynaysaan darteed" (Al-Anbiyaa: 16- 18).

Kanna waa goodis (handadaad) daran oo Allaah xaggii uga ahaaday dhammaan bani'aadamkan tabarta daran ee aan awoodin inay hor istaagaan xaqa awoodiisa iyo waxa uu doonayo. Sidaa darteed ayuu Allaah wuxuu caddeynayaa inuu xaqa ku tuurayo (ganayo) xaqdarrada ama gaalnimada oo uu kaddibna burburinayo

﴿ بَلْ نَقْذِفُ بِالْحَقِّ عَلَى الْبَاطِلِ فَيَدْمَغُهُ فَإِذَا هُوَ زَاهِقٌ ﴾ [الأنبياء: ١٨]

Markaasaa la arkayaa iyadoo xaqdarradii noqatay wax baaba'ay, intaa kaddibna waxa idiin ahaaday hoog iyo halaag wixii aad Allaah ku sheegteen darteed, ama diintiisii aad ku sheegteen ama rasuulkiisii iyo kuwii rumeeyay sido kale.

Dhinaca kale haddaad ka eegto waxaa jira khalqi garanaya Allaah qaddarkiisii iyo wixii uu mudnaa

﴿ وَلَهُ مَنْ فِي السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَنْ عِنْدَهُ لَا يَسْتَكْبِرُونَ عَنْ عِبَادَتِهِ وَلَا يَسْتَحْسِرُونَ ۞ يُسَبِّحُونَ اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ لَا يَفْتُرُونَ ﴾

[الأنبياء: ١٩-٢٠]

"Allaah waxa uu leeyahay inta samada iyo dhulka joogta, addoomada agtiisa ahaadayna iskama weyniisiyaan cibaadadiisa kamana daalaan. Habeen iyo maalin bay u tasbiixsadaan kamana noogaan" (Al-Anibiyaa: 19-20).

Haddaba hadduu bani'aadamkani aanu ahayn mid Allaah qaddarkiisii uu mudnaa siinaya oo sidoo kale aan siinayayn kitaabkiisii (Qur'aanka) qaddarkiisii uu mudnaa oo sidoo kale aan qaddarinayn dhammaan waxyaabaha dhabta ah ee jira, haddaba waxaa jira noole kale oo aanu qaar naqaano qaarna aanaan aqoon (sida laga fahmayo aayadda) oo Allaah iyo kitaabkiisii Qur'aanka qaddariya oo aan is kibrinayn oo habeen iyo maalinba Allaah ayay amaanayaan oo ay ka hufayaan ceeb oo dhan meesha bani'aadamka qaarkii (gaalada) ay is kibriyaan.

Marka uu bani'aadamku shareecada Allaah fuliyo ee uu ku dhaqmo isagoo Allaah ku caabudaya iyo sidoo kale marka lagu daro in adduunku dhammaantii uu Allaah u hoggaansan yahay ayaa waxaa halkaa ka caddaanaysa in bani'aadamku uu ku sugan yahay meel halis ah oo cabsi leh maxaa yeelay hadduu ka leexdo shareecada Allaah ee adduunka intiisa kale u hoggaansan yahay wuxuu mutaysanayaa hoog iyo baaba'.

﴿ بَلْ نَقْذِفُ بِالْحَقِّ عَلَى الْبَاطِلِ فَيَدْمَغُهُ فَإِذَا هُوَ زَاهِقٌ ﴾ [الأنبياء: ١٨]

Marka uu bani'aadamku isla jaan-qaadaan kownka kuna dhaqmaayo shareecada diintaan Islaamka oo ahayd shareecadii iswaafajin lahayd naftiisa labadeeda dhinac ee midna yahay mid xor ah oo ikhtiyaar leh midna uu yahay mid aan lahayn ikhtiyaar markuu saas sameeyo wuxuu noqonayaa mid la jira oo ka mid ah kuwii Allaahuu ammaanay ee aan iska kibrinin cibaadada Allaah oo habeen iyo maalinba u taagan amaanta Allaah.

Wuxuu leeyahay Ustad Sayid Qudub: **(Bani'aadamka fidradiisaxaqaan si xeel dheer ayay u garanaysaa maxaa yeelay habkuu bani'aadamku u samaysan yahay iyo habkuu adduunkani u samaysan yahay ayaa labaduba waxay u sheegayaan fidradiisa in jiritaankani yahay mid ku dhisan xaq, xaquna asal ku yahay, kuna sugan yahay xeerka guud ee adduunka maamulaya, isku dhex yaaci maayo, waddadu kala geynmayso, iskuna dhicimaayan qaarba qaarka kale. Kuma socdaan iska ahaansho ama qorshe la'aan, mana waddo hawo iyo rabitaan is rogroga. Wuxuu ku socdaa nidaam sugan oo daqiiq ah oo loo qaddaray qiyaas).**

Sidaa darteed ayuu Allaahna farayaa inaan ku fekerno abuurista cirka iyo dhulka iyo isweydaarka habeenka iyo maalintii oo aan aragno xeeldheerida Allaah u abuuray jiritaankaan, si aan u garanno ugana baranno sidii loo socodsiin lahaa ama loo maamuli lahaa arrimaheenna noo gaarka ah iyo kuwa guudba, sida ugu haboonna ulana jaan qaadno jiritaanka intiisa kale.

Haddii bani'aadamku shareecada Allaah ku dhaqmo wuxuu is arkayaa isagoo sida koownka intiisa kale u soconaya. Maxaa yeelay adduunku dhammaantii iskama ahaanin mana isku dhec yaacsana, wuxuu ku socda nidaam aad u xeel dheer oo uu Allaah u qaddaray.

## Ciribxumada ka weecasha Fidrada

Wuxuu leeyahay Ustad Sayid Qudub: **(Iska hor imaadka ugu horreeya ee ka dhex dhaca nafta bani'aadamka iyo fidradiisa waa marka uu bani'aadamku ka leexdo xaqii fidradiisa ku duugnaa asaga oo ay hawadiisu wado, waana marka uu ka dhigto hawadiisameesha uu shareecada ka qaadan lahaa, iyo marka aanu isu dhiibin Allaah sida uu kownka intiisa kale ugu jajaban yahay Allaah oo uu isugu dhiibay).**

Aragtidaas waxay noqonaysa mid dhaqan ah oo lagu camal falo mana aha aragti kaliya (sida cadawga Islaamka qaar ka mid ah ku tilmaamaan) ama falsafad, balse waaba cilmiga iyo xaqa kaliya ee jira, mana jiri karoxaq iyo cilmi kale. Insaanka iyo kownku waxay ku socdaan qawaaniin sugan oo xukunta nolasha aadanaha labadeeda qeybood; tan doorashada loo siiyay iyo tan aan loosiinba. Allaah wuxuu dejiyay shareeco waafaqsan xeerarka kale ee kownka sidaa darteed ayaduna waa shareeco kowni ah. Bani'aadamku markuu ka tago sharciga Allaah wuxuuraacaya hawadiisa iyo dabcigiisa iyo ijtihaadkiisa, waana marka uu naftiisa baabi'inayouuna dhacayo kala go' uu ku gubanaayo.

Wuxuu leeyahay Ustad Sayid Qudub: **(Marka uu dhaco kala go'aas u dhexeeya dadka, kooxaha, ummadaha iyo facyada (jiilal) ama u dhexeeya aadanaha iyo kownka ku hareeraysan ayaa awoodii bani'aadamku iyo kaydkii uu uruursaday waxay isu beddelayaan kuwo u horseeda burbur iyo rafaad, meeshii ay ka ahaan lahayd sababihii u horseedi lahaa horumar iyo baraare).**

Kala go'a dadka u dhexeeya keli keli iyo kooxaba wuu iska cad yahay. Marka ay dadku hawadooda raacaan waxay galayaan loollaniyo dagaal, xadgudub iyo isdil dhexdooda ah markaasay dadku ku noolaanayaan rafaadkaas ay maanta ku nooshahay Yurub, Maraykan iyo wixii la mid ah. Heer waxaa la marayaa in dadku xataa aanay duhur cad keligood dibedda u bixi karin waddamad qaar iyadoo lala socdo mooyaane, si ay isaga celiyaan burcadda i.w.m. Sidoo kalena qof haween ahi aanay keligeed socon karin baqdin ay ka baqaysa in la afduubto ama la kufsado darteed.

Marka sharciga Allaah laga tago waxaa dhacaya rafaadka, dagaalka, cabsida, barako la'aanta iyo amaan darrada ay ku nool yihiin ummadaha ku talax-tagay amar-diidadda Allaah. Waa goortaa marka la arkayo ceebaha iyo fadeexooyinka sida fadeexaddii Bill Clinton (madaxweynihii hore ee Maraykanka). Waxaa isweydiin leh waa maxay faa'iidada ku jirta buuqa laga oogay ninkaas dhaqanka xun? Maxay tahay qiimaheedu? Jawaabtu waa dadkan ayaa doonaya inay ku dhex noolaadaan hadal haynta habeen iyo maalin arrimahan wasakhda ah, iyadoo sicir qaali ah lagu iibsanayo buugaagta ka sheekaynaysa qurunkaas,oo marka la daabaco horey laga dhammaysanayaa weliba sicir qaali ah, waxaana loo faafinayaa in dadka dhegahooda iyo quluubtooda lagu wasakheeyo. Markaasaa ninkaas wax iskuma falaha ahweli sii yahay madaxweynaha dawladda adduunka ugu xoogga badan, welina qaabilayaa oo salaamayaa madaxda soo booqanaysa iyagoo aan ka ash-ashayn la kulankiisaas. Waxaana la oran karaa waa ninka ugu wasakhaysan ee ma aha ninka adduunka ugu weyn. Hayeeshee sidaas ayay dadku caadaysteen, in ceebta noocaas oo kale ah aanay waxba u dhimin ninka derejadiisa iyo derejada dadka uu ka tirsan yahay, waana arrin lala yaabo in dadku sidaas u nool yihiin kuna raalli yihiin.

Haddaba kala go'a u dhexeeya dadka iyo kooxaha waa wax iska cad oo la filanaaye.

Sidoo kalena waxaa la mid ah kala go'a aadanaha iyo kownka ku hareeraysan,waxa uu kasoo dhex muuqanayaadagaallada ka dhexeeya, sidoo kale hal-abuurkooda wax baabi'iya khatartana ku ah nolosha aadanaha, saamayna ku leh isku dheelli tirka kowniga ah. Waxaana shaki la'aan ah in markasta oo dadku fara-galiyaan iswaafaqsanaanta xeerarka kownka inuu ka dhalanayo ku talax-tag ama ka gaabis ama baaba'a iyo burbur ku dhaca nolosha aadanaha.

Tusaaleyaal badan ayaa arrinkaa laga bixin karaa. Markasta oo bani'aadamku faragashado isku dheelitirka ka jira dhulka ama kownka waxa ka dhasha nolosha bani'aadamka oo khalkhal gasha. Haddii uu rumoobo dulka ka samaysmay dahaarka dhulka ee loo yaqaan awsone (Ozone) waa dhib aadanuhu geystay. Waxay meelo ka mid ah Yurub ka suuliyeen gobollo dhan oo keymo ah, waxaana ka dhashay dildillaac iyo hoobasho dhulka ku yimaada. Markay Ustaraaliya ka tirtireen bakaylaha kaddib markay ku sallideen nooc ka mid ah xaywaanaadka si uu u baabi'iyo, waxay ku wareereen siday uga takahlusi lahaayeen cadwga cusub (kii bakaylaha cunay).

Mar bay geedo gaar ah abuureen si laysaga ilaaliyo jiirka (doolli) ayay dhirtaasi noqotay balaayo ku fidda guryihii oo laga noolaan waayay. Markasta oo dadku sameeyaan wax ay ku faragashanayaan isu dheelitirka uu Allaah ugu tala galay kownkaan waxay kasii qaadaan hoog.

Markasta oo bani'aadamku oo ka baxo kuna xadgudbo anshaxa iyo dhaqanka wuxuu is arkaa asagoo ku dhacay camal iyo nolol teeda ugu xun. Waxaa dhab ah in kala go'aas u dhexeeya dadka iyo kownka uuka yimid faragashiga uu bani'aadamku ku sameeyo isu dheelitirka kownka ama uu soo saaroqalab khalkhal gelinaya dheelitirka dhulka, dhagaxda iyo wax kasta oo kownka ku sugan. Markastoo arrimahaasi dhacaan shar iyo kala go'u way imaan.

Sidoo kale marka kala go'aas u dhexeeya dadka iyo kownka intiisa kale uu dhaco ayaa waxaa ka dhalanayacaro Allaah, markaasaa Allaah wuxuu ku salidayaa adduunkaan sida qarax buureedka (baraakiin/folkaano), dhul-gariiryada iyo duufaannada. Ciqaabta noocaas ah waa mid ka dhalatay amar-diiddadii Allaah, markaasuu ku salidaayaa kownkaan aanay iska celin karin ama hor-istaagi karin. Dhinaca kale kownka waa mid Allaah dembi dhaaf u waydiinaya dadka mu'miniinta ah. Sidoo kale kalluunka badda ku jira iyo malaa'igtu ayaa u ducaynayaan mu'miniinta. Wax kasta oo kownka ku sugan waxay khayr la jacel yihiin mu'miniinta gaaladana cadaawad bay u hayaan.

Sidoo kale qofka markuu gaal noqdo oo qaddarka Allaah caro kula dhaqmo oo uusan ku raalli noqon nasiibkiisa iyo waxa uu Allaah u qaddaray. Haddii dhibaato haleeshana ciriiri iyo gaalnimo ayuu kasii qaadaya maxaa yeelay waa nin collaytan kala dhexeeya dhamaan qaddarka Allaah.

Meeshii ay noqon lahayd awoodda kownkaan mid u horseedda insaanka horumar, nolol fudud iyo raaxo, waxay isu rogtaa – sidaan arkayno – qumbalad nugliyeer bani'aadamka baabi'naysa noloshiisa, iyo kiniiniga dhalmo joojinta oo ay ka dhalanayso fisqiga iyo faafista cudurada galmada sharci-darrada. Waxaas oo dhibaato ah waxay imanaysaa marka sharciga Allaah laga tago, oo dadka loollan iyo dagaal la galaan Allaah, naftooda iyo aduunkaba.

## Waa maxay hadafka ku dhaqanka Shareecada Allaah

Ustad Sayid Qudub wuxuu leeyahay **(Haddaba ujeeddada muuqata ee laga leeyahay in sharciga Allaah laga oogo dhulkaan ma aha oo keliya in aakhiro loo shaqaysto, adduunyada**

**iyo aakhiradu waa laba xilli oo is dhammaystiraya, shareecada Allaahna waa midda is waafijanaysa labadooda (adduun iyo aakhiro) ee nolosha bani'aadamka. Shareecada Allaah waxay is waafajinaysaa nolosha aadanaha dhammaanteed iyo xeerkaa guud ee Ilaahiga ah).**

Ku dhaqanka shareecada kowniga ah waxay suurtgelinaysaa nolol wanaagsan adduun iyo aakhiraba, waxaanay isku duba-ridaysaa nolosha wanaagsan ee dadkaka dhexeysa iyaga, naftooda iyo kownkaan.Ma aha oo keliya mid lagaga badbaado xisaabta iyo su'aasha aakhiro.

Ustad Sayid Qudub wuxuu leeyahay:**(is waafaqidda xeerka guud ee kownkanliibaan akhiro oo kaliaya laguma helo, balseliibaantaasu waxayku dhabawdaa inta adduunka la joogo, kaddibnawaxay dhammaystirmaysaa marka aakhiro la tago).**

﴿ مَنْ عَمِلَ صَالِحًا مِنْ ذَكَرٍ أَوْ أُنْثَى وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَلَنُحْيِيَنَّهُ حَيَاةً طَيِّبَةً وَلَنَجْزِيَنَّهُمْ أَجْرَهُمْ بِأَحْسَنِ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴾ [النحل: ٩٧]

"Qofkii camal suuban la yimaadda – lab iyo dheddig – isagoo mu'min ah waxaannu noolaynaynaa nolol wanaagsan waxaanna ugu abaal-gudidoonaaabaalmarintooda tii ugu wanaagsanayd ee ay shaqaysteen" (Al-Naxli: 97).

﴿ وَلَوْ أَنَّ أَهْلَ الْقُرَى آمَنُوا وَاتَّقَوْا لَفَتَحْنَا عَلَيْهِمْ بَرَكَاتٍ مِنَ السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ ﴾ [الأعراف: ٩٦]

"Haddii ay dadka magaalooyinku rumayn lahaayeen oo dhowrsan lahaayeen waxaanu korkooda ku furi lahayn barakooyinka cirka iyo dhulka ahaaday" (Al-Acraaf: 96).

﴿ فَقُلْتُ اسْتَغْفِرُوا رَبَّكُمْ إِنَّهُ كَانَ غَفَّارًا ۞ يُرْسِلِ السَّمَاءَ عَلَيْكُمْ مِدْرَارًا ۞ وَيُمْدِدْكُمْ بِأَمْوَالٍ وَبَنِينَ وَيَجْعَلْ لَكُمْ جَنَّاتٍ وَيَجْعَلْ لَكُمْ أَنْهَارًا ﴾ [نوح: ١٠-١٢]

"Wuxuu Allaah leeyahay isagoo Nebi Nuux ka sheekaynaya: (Waxaan ku iri – qowmkaygii – Allaah dambi dhaaf weydiista waa dambi dhaaf badanee. Cirkana roob badan ha idinkaga keenee. Hana idiin kordhiyo xoolo, wiilal iyo beero hana idiin yeelo wabiyaal" (Nuux: 10-12).

﴿ وَيَزِدْكُمْ قُوَّةً إِلَى قُوَّتِكُمْ ﴾ [هود: ٥٢]

"Wuxuu Allaah leeyahay isagoo Nebi Huud ka sheekaynaya (hana idiin ku kordhiyo (Allaah) xoog, xoogiina" (Huud: 52).

Rumaynta Allaah iyo ku dhaqanka shareecadiisa waxay nolosha bani'aadamka siinaysaa raaxo iyo baraare maaddi iyo macnawiba, Aakhirananolol raaxo leh iyo Allaah oo raalli ka ah. Sidaa darteed Jannadu waa nooc ka mid ah nimcada aanaan maanta fahmi karin ama dhadhamin karin ilaa Allaah uu nagu galladaysto maalinta qiyaamaha.

Nolosha Jannada dhaxdeeda waa mid la yaab leh. Ma laha daal, rafaad iyo hurdo. Waa macaan joogto ah. Wax kasta qofka uu kahelayo Jannada waa ka duwan yahay waxa uu ka helayo adduunyada, mana jiro wax kaa qasaya noloshaas wanaagasan ee jannada. Qofka Jannada galaa weligii ma gaboobo, da'adiisu ma korodho.Nimcada dhammaystirkeedu waa aakhiro. Hayeeshee, wuxuu Allaah wax yar oo dhadhanka nolosha Jannada nagu siiyaa adduunyada markaan shareecada Allaah oogno oon Allaah la noolaanno, markaasay noo fududaanaysaa nolosha adduunka Allaahna uu noo nicmeynayaa.

﴿ وَلَوْ أَنَّهُمْ أَقَامُوا التَّوْرَاةَ وَالْإِنْجِيلَ وَمَا أُنْزِلَ إِلَيْهِمْ مِنْ رَبِّهِمْ لَأَكَلُوا مِنْ فَوْقِهِمْ وَمِنْ تَحْتِ أَرْجُلِهِمْ ﴾ [المائدة: ٦٦]

"Wuxuu Allaah leeyahay (Hadday oogi lahaayeen Tawreet iyo Injiil iyo wixii xagga Rabbigood loogasoo dejiyay, waxay wax ka cuni lahaayeen korkooda iyo hoostooda (barwaaqo)" (Al-Maa`ida 66).

﴿ وَعَدَ اللَّهُ الَّذِينَ آمَنُوا مِنْكُمْ وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ لَيَسْتَخْلِفَنَّهُمْ فِي الْأَرْضِ كَمَا اسْتَخْلَفَ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ وَلَيُمَكِّنَنَّ لَهُمْ دِينَهُمُ الَّذِي ارْتَضَى لَهُمْ وَلَيُبَدِّلَنَّهُمْ مِنْ بَعْدِ خَوْفِهِمْ أَمْنًا ﴾ [النور: ٥٥]

"Wuxuu Allaah leeyahay isagoo mu'miniinta adduunyada ugu balanqaadaya (Allaah wuxuu u yaboohay kuwa Isaga rumeeyay oo camal wanaagsanna falay inuu dhulka dhaxalsiin doono siduu u dhaxalsiiyay kuwii iyaga ka horreeyay isla markaana inuu diintoodii uu raali uga noqday u hirgelin doono oo uu weliba cabsiday qabeenna ugu beddeli doono nabadgaliyo" (Al-Nuur: 55).

(وليتمن الله هذا الأمر حتى يسير الراكب من مكة إلى حضرموت لا يخاف إلا الله والذئب على غنمه)

(Xadiiskii ku yaallay Bukhaariga waakii Nebi Muxamad SCW yiri (Allaah arrinkan wuu dhammaystiri doonaa ilaa uu kan awrka ama faraska saaran uu Mako kasoo safro isagoo kusii jeeda Xadramawt kana baqanayn Allaah mooyee iyo arigiisa uga baqo yeyda) [1].

Markaasay nolosha adduunyo isku rogtaa nimco intaan aakhiro la gaarin. Nimco ah dareenka nafta

﴿ أُولَئِكَ لَهُمُ الْأَمْنُ ﴾ [الأنعام: ٨٢]

"Kuwaa oo kaliyaa ayaa ammaan u sugnaaday" (Al-Ancaam: 82).

Nicmo la taaban karo oo ah barwaaqo iyo khayr ah. Waxay dhadhansanayaan quruxda kownkaoo Allaah baranayaan, kuna raaxaysanayaan Jannada adduunka intaan tan aakhiro la gaarin.

## Allaaha kownka leh ayuun baa mudan maamulka Nolosha

Ustad Sayid Qudub wuxuu leeyahay: **(Waa taa asalkaaragtida Islamku ka qabo jiritaanka oo idil iyo kan bani'aadamkaba, waana aragti gebi ahaanba ka duwan aragti kasta oo bani'aadamka soo martay, sidaa darteed waxaa aragtidan ka dhalanaya xil ama mas'uuliyad aan ka dhalanayn aragtiyaha kale ee adduunka ka jira).**

Dhammaan aragtiyaha iyo mad'habaha kale ee adduunka ka jiraa waxay ku dhisanyihiin fikrado baadiyeysan oo kala dhex gelaya bani'aadamka iyo xaqa, nolosha farxadda leh iyo ammaanka iyo badbaado aakhiro. Bal iskaba dhaafe waxay u diyaarinaysaa cadaab Jahanama lagu waaro aakhiro – Allaah hanaga koriyee. Isla markaana aragtiyahaas waa kuwo aan caqli-gal ahayn oo aan la fahmi karin. Sidaa darteed waxa tiradii ka batay aragtiyaha iyo mad'habaha. Mid kasta oo falsafad ama mad'hab wataa wuxuu la yimaaddaa aragtiyo aan Allaah xujo kusoo dejin, qaar badan oo kamid ahna waxay kugu dhalinayaan qosol iyo quursi. Meesha uu xaqu ka yahay kii ay Nebiyadu Allaah xagiisa kala yimaaddeen.Waxaad arkeysaa isagoo ah xaq raaxo leh, la fahmi karo, sarreeya, qurux badan oo meel sare kasoo ifiya oo fidrada bani'aadamku ku farxayso adduunyo iyo aakhiraba. Waxayna dareemayaa sharaf iyo isla sarreyn kaasoo aan cutubyada dambe kaga hadli doonno Haddu Rabbi Idmo.

Ustad Sayid Qudub wuxuu leeyahay **(Ku dhaqmidda shareecada Allaah waa waxa kaliya isku xirikara nolosha aadanaha iyo kownka).**

Arrinku ma aha ku dhaqan diin ama sharci oo kaliya, balse waa arrin caadi ah oo ay nolosha aadanuhu keensanayso haddii ay waddo sax ah marto iyadoo qeyb ka ah kownkaan.

Ku dhaqmidda shareecada Allaah waa waxa kaliya ee isku xirikara nolosha aadanaha iyo kownka maadaama ay wada yihiin kuwo Allaah abuuray.

Ustad Sayid Qudub wuxuu leeyahay **(Sidoo kale waxay (shareecada Allaah) kusii xirtaa xeerarka maamula fidrada bani'aadamku iyo kownkaan),** nolosha bani'aadamka waxaa dhaqaajiyo isla xeerarka dhaqaajiyo kownka, waana xeerka kaliya oo laga doonayo bani'aadamku inuu u hoggaansamo dhinaciisa uu ikhtiyaarka u leeyahay. Haddaba shareecada Allaah waa shareeco kowni ah.

Waxaa sidoo kale muhiim ah inay iswafaqaan xeerarka kownka iyo kuwa maamula nolosha bani'aadamka, inloo hoggaansamo shareecada Allaah waxay xaqiijinaysa addoonimada aadanaha Allaah keligii addoon u yihiin. Sida aanu u jirin qof miyirkiisa qaba oo sheegan kara inuu kownka abuuray sidoo kale ayaanu u jirin bani'aadam sheegan kara inuu leeyahay xaqa dejinta sharci dadka noloshooda maamula.

Ustad Sayid Qudub wuxuu leeyahay: **(Ku dhaqanka shareecada Allaah waa wax ka yimid isku xirnaanta ka dhexeysa nolosha aadanaha iyo nolosha kownkaan, xeerka guud ee xukuma fidrada insaanka iyo kownkaba. Sidaa darteed waa lagama maarmaan inay iswaafaqaan xeerarka kowniga ah iyo shareecada nolosha aadanaha nidaaminaysa. Ku dhaqanka shareecadu wuxuu xaqiijinayaa addoonnimada aadanuhu Allaah addoon u yahay sida kownka oo dhami Allaah keligii addoon ugu yahay oo aan insaan naftiisa u sheegan karaa jirin).**

Sida uu kownka Allaah addoon ugu yahay oo qofna aanu u sheegan karin inuu kownka abuuray ama inuu kownka socodsiiyo ama inuu xiddigaha socodsiinayo, sidaas oo kale ayaanu bani'aadamku isagu is abuurin,xaqna ugu laheynin uu shareeco naftiisa u dejiyo,mana uusan abuurindaaquut shareeco u dejiya.

Allaah ayaa abuuray bani'aadamka iyo kownkaba. Allaah ayaa dejiya sharciga. Waxaana loo baahan yahay in shareecada bani'aadamku uu ku dhaqmayo ay noqoto mid Allaah xaggii ka timid. Sidaas ayay shareecada Allaah ku noqonaysaa shareeco kowniah; maxaa yeelay waxay iyana kasoo burqatay isla barta iftiinka Ilaahiga ah; Allaah baa ah Rabbiga jiritaankan iyo bani'aadamka dhinaciisa leh ikhtiyaarka iyo dhinaca aan lahaynba, Bani'aadamku waa addoon xag Allaah laga wado sidaa darteed waxa iska cad in shareecada bani'aadamkaas maamulaysa iyana noqoto mid xagga Allaah ka timid. Umana bannaana aadanaha oo idil inay degsadaan shareeco ka madax bannaan Allaah, maxaa yeelay arrinkaasi wuxuu ka hor imaanayaa dhabta iska muuqata ee ah inuu bani'aadamku iyo kownkaba Allaah addoomo u yihiin, cidda kownkaan maamusha ayaana xaq u leh kuna habboon inay bani'aadamka sidoo kale maamusho.

Haddii bani'aadamku dhinaciisa aanu ikhtiyaarka u lahayn uu u hoggaansan yahay xeerka guud ee kownka maamula, sidaa oo kale dhinaciisa kale ee uu ikhtiyaarka u leeyahay ayuu u raacayaa xeerkaas guud.Shareecadu waa qayb ka mid ah xeerkaas guud ee kownka maamula,mana aha wax ka go'an ama gooni u taagan.

Ustad Sayid wuxuu leeyahay: **(Mudnaanta is waafaqidda iyo isla jaanqaadkaasi waxaa bidhaaminaya sheekadii dhex martay Nabi Ibraahiim-Aabbaha muslimiinta- iyo Namruudkii kibirsanaa ee sheeganayay xaqa awoodda maamulka addoommada iyo dhulkaba. Namruud waa kii sheegan waayay awoodda maamulka xiddigaha iyo kownka, waa kii wareeray markuu nabi Ibraahiim CS ku yiri: kan iska leh awoodda kownkaan kaligii baa mudan inuu xukumo nolosha aadanaha, halkaa ayuuna ku afjigmay)**.

﴿ أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِي حَاجَّ إِبْرَاهِيمَ فِي رَبِّهِ أَنْ آتَاهُ اللَّهُ الْمُلْكَ إِذْ قَالَ إِبْرَاهِيمُ رَبِّيَ الَّذِي يُحْيِي وَيُمِيتُ قَالَ أَنَا أُحْيِي وَأُمِيتُ قَالَ إِبْرَاهِيمُ فَإِنَّ اللَّهَ يَأْتِي بِالشَّمْسِ مِنَ الْمَشْرِقِ فَأْتِ بِهَا مِنَ الْمَغْرِبِ فَبُهِتَ الَّذِي كَفَرَ وَاللَّهُ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ ﴾ [البقرة: ٢٥٨]

"Ka warran kii warkiisa kula murmay Nebi Ibraahim Rabbigiisa, (waa Namruud) in Allah siiyey boqornimo, markuu Nebi Ibraahim yiri: Allaah wuu nooleeyaa wuuna dilaa, marka uu yiri (gaalkii) amba waan nooleeya oo dilaa, markaas Nebi Ibraahim yiri Allaah wuxuu ka keenaa qorraxda bari ee ka keen galbeed, markaasaa la wareeriyey kii gaaloobay, Allaah ma hanuuniyo qoom daalimiin ah"(Al-Baqara:258)

Meesha dooddu ku wareegaysa waxa weeye "Allaah ayaa leh kownka socodsiiyana, asaga keliya ku habboon xaqna u leh inuu maamulo nolosha aadanaha oo keligii caabudaan". Haddii qof sheegto inuu xaq u leeyahay inay dadku isaga addoomo u noqdaan, marka hore hanoo sugo inuu kownkaan ka dhigi karo mid isaga addoon u ah, kaligiina socod siin kara,taasina qofna ma samayn karo cidduu doono ha ahaadee. Sidaa darteed qofna ma sheegan karo inuu yahaykan kownka kala socod siiya iskaba dhaaf inuu abuuraye. Intaa dabadeed waxay noqonaysaa ku dhaqanka shareecada Allaah qayb ka mid ah xeerka guud ee kownka u hoggaansan Ilaahnimada Allaah keligii, waxay noqon shareecadani shareeco kowni ah, shareeco ku lifaaqan kuna milan jiritaanka insaanka.Aadanuhu ma awoodo inuu ka fakado ama iskaga tago sida aanu u awoodin inuu joojiyo neefsashadiisa ama garaaca wadnihiisa. Shareecadu waa qayb ka mid ah bani'aadamka jiritaankiisa maxaa yeelay shareecadu waa qayb ka mid ah xeerarka guud ee Allaah. xiriirka bani'aadamku la leeyahay shareecada Allaah wuxuu noqon mid kalgacayl iyo addoonnimo ku jirto, uusanna ka maarmin.

﴿ أَفَغَيْرَ دِينِ اللَّهِ يَبْغُونَ وَلَهُ أَسْلَمَ مَنْ فِي السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ طَوْعًا وَكَرْهًا وَإِلَيْهِ يُرْجَعُونَ ﴾ [آل عمران: ٨٣]..

"Allaah run buu sheegay markuu yiri: (Ma diinta Allah waxaan ahayn ayey rabaan isagoo uu u hogaansamay waxa samaawaadka iyo dhulka ku sugan ogolaan iyo ikraahba, xaggiisaana dadka loo celin" (Aala-Cimraan: 83).